

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 8aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2020

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2020

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

**KOBNIIN**

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**SANADKA**

**2020**

**ANSIXINTA SHARCIGA HESHIISKA QARAMADA MIDOOBAY EE  
LA-DAGAALANKA MUSUQ-MAASUQA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka “q” ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/348/2/B-10/20 Taariikh: 29/12/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-Dagaalanka Musuq-maasuqa

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

***Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:***


**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-Dagaalanka Musuq-maasuqa

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 31/12/2020**



Madaxweynaha J.F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



# **HESHIISKA QARAMADA MIDOOBAY EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA**

*Waxaa Turjumay: Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka*

*2020*

**CUTUBKA I**  
**QODOBBO GUUD**

**QODOBKA 1<sup>AAD</sup>**  
**UJEEDDADA HESHIISKAN**

**Ujeeddada Heshiiskan waa:**

- (a) in kor loo qaado lana xoojiyo tallaabooyinka looga hortagayo la- dagaallanka musuq-maasuqa si hufan oo wax-ku-ool ah;
- (b) in kor loo qaado loona taageero iskaashiga caalamiga ah iyo farsamada Caawinta ka hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa, oo ay ku jirto dib u soo-celinta hantida; iyo
- (c) in kor loo qaado hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo maareyn hab-sami leh ee arrimaha dadweynaha iyo hantida dadweynaha.

**QODOBKA 2<sup>AAD</sup>**  
**QEEXID**

Si waafaqsan ujeeddooyinka Heshiiskan, waxaa ereyadan soo socda lagu qeexayaa:

(a) “Sarkaalka dadweynaha” waxaa loola jeedaa: (i) qof kasta oo haya xafiis sharci-dejin, fulin, maamul ama garsoor ee Dawlad Xubin ah, ha ahaado qof la magacaabay ama la doortay, mid ku-meel-gaar ah ama mid joogta ah, qof lacag qaadanaya ama qof aan lacag qaadan, iyadoo aan loo eegin qofkaas darajadiisa; (ii) qof kasta oo kale oo qabta shaqo guud, oo ay ku jiraan hay'ad dawladeed ama shirkad dadweyne, ama bixiya adeeg dadweyne, sida lagu qeexay sharciga gudaha ee Dawladda Xubinta ah iyo sida loogu dabaqay qeybta ku habboon ee sharciga Dawladda Xubinta ah; iyo (iii) qof kasta oo kale oo lagu qeexay inuu yahay “sarkaal dawladeed” sharciga gudaha ee Dawlad Xubin ah. Si kastaba, si waafaqsan ujeeddooyinka qaar kamid ah tallaabooyinka gaarka ah ee ku xusan Cutubka II ee Heshiiskan, “sarkaal dawladeed” waxaa lagu macnayn karaa qof kasta oo qabta hawl dadweyne ama bixiya adeeg dadweyne sida lagu qeexay sharciga gudaha ee Dawladda Xubinta ah iyo sida loogu dabaqay sharciga ku habboon ee Dawladda Xubinta ah;

(b) “Sarkaal Dadweyne ee Shisheeye” waxaa loola jeedaa qof kasta oo haya jago sharci-dejin, fulin, maamul ama jago garsoor dal shisheeye, ha ahaado mid la magacaabay ama la doortay, si ku-meel-gaar ah ama joogto ah,

iyo qof kasta oo qabta shaqo dadweyne, sida hay'ad dadweyne ama ama shirkad dadweyne;

(c) "Sarkaal dadweyne ee urur caalami ah" waxaa loola jeedaa shaqaale dadweyne oo caalami ah ama sarkaal ama qof kasta oo ay magacowdo hay'ad caalami ah, isagoo u matalaya wakiil ahaan.

(d) "Hanti" waxaa loola jeedaa hanti nooc kasta oo ay tahay, walax la taaban karo ama aan la taaban karin, guurto ama ma-guurto, iyo dokumentiyo qaanuuneed ama aalado caddeynaya lahaansho ama dan la xiriirta hantidaas;

(e) "Faa'iidooyin fal-dembiyeed" waxaa loola jeedaa wixii hanti ah oo ka yimaada ama lagu helay fal-dembiyeed, toos ama dadab, loo maray gelitaanka xad-gudub;

(f) "Xannibaad" ama "Xayiraad" waxaa loola jeedaa ku-soo-rogid xayiraad ku-meel-gaar ah, wareejinta, caddeyn, dhaqdhaqaaq hanti, ama gacan-ku-hayn ku-meel-gaar ah ama ilaalin hanti, si ku saleysan amar maxkamadeed ama hay'ad kale oo awood u leh;

(g) "La-wareegid" waxaa loola jeedaa la-wareegid hanti si joogta ah amar ka soo baxay maxkamad ama hay'ad kale oo awood u leh;

(h) "Xad-gudub dahsoon" waxaa loola jeeda dembi kasta oo ka dhasha Faa'iidooyinka laga helo fal-dembiyeed in uu noqonayo xad-gudub sida ku qeexay Qodobka 23<sup>aad</sup> ee Heshiiskan;

(i) "Gudbin xakameysan" waxaa loola jeedaa farsamada u oggolaanaysa shixnadaha sharci-darrada ah ama tuhun ku jiro inay ka gudbaan, gudaha ama galaan hal waddan ama in ka badan, iyadoo la raacayo aqoonta iyo kormeerka hay'adaha awoodda u leh, iyadoo aragtidu tahay baaritaan Xad-gudub iyo aqoonsiga shakhsiyaadka ku lugta leh gelitaanka xad-gudubka

### **QODOBKA 3<sup>AAD</sup>**

#### **BAAXADDA HESHIISKAN**

1. Iyadoo la dabaqayo Heshiiskan iyo si waafaqsan qodobbadiisa ku saabsan Baarista, dacwad-oogista ee musuq-maasuqa, xannibaada, xayiraada, la-wareegidda iyo dib-u-soo-celinta hantida laga faa'iiday fal-dembiyeed si waafaqsan Heshiiskan.

2. Si waafaqsan ujeeddooyinka lagu hirgelinayo Heshiiskan, ma ahan lagama-maarmaan, marka laga reebo in si kale loogu sheego halkan, si ku aaddan xad-gudubyada ku xusan isaga dhexdiisa in laga dhaxlo waxyeello ama dhaawac hantida dawladda.

## **QODOBKA 4<sup>AAD</sup>**

### **ILAALINTA MADAX-BANNAANIDA**

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay u fulinayaan waajibaadkooda si ku aaddan Heshiiskan ee qaab waafaqsan mabaadi'da sinnaanta madax-bannaanida iyo in aan la faro-gelin arrimaha gudaha ee Dawladaha kale.

2. Ma jiraan wax Heshiiskan dhexdiisa ah oo u jideynaya Dawlad Xubin ah in ay ka qabato xuduuda Dawlad kale fulinta ikhtisaas iyo waxqabad shaqooyin si buuxda loogu gaar-yeelay hay'adaha Dawladaas kale si waafaqansan sharcigeeda gudaha.

## **CUTUBKA II**

### **HAL-BEEGYO KA-HORTEGITAAN**

## **QODOBKA 5<sup>AAD</sup>**

### **SIYAASADO IYO WAXQABADYO KA-HORTIGITAAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay, si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, horumarinaysaa oo hirgelinaysaa ama adkeynaysaa si wax-ku-ool ah, siyaasado la-dagaallan musuq-maasuq oo iskuduwana oo kor u qaadaya ka-qeyb-qaadashada bulshada iyo adeegsiga mabaadi'da talinta sharciga, maareyn hab-sami leh ee arrimaha dadweynaha iyo hantida dadweynaha, hufnaan, daah-furnaan iyo isla-xisaabtan.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay ku dadaalaysaa dejinta qaab wax-ku-ool ah oo looga hortagayo musuq-maasuqa.

3. Dawlad kasta oo xubin ah heshiiskan, waxay ku dadaalaysaa sameynta qiimeyn-xilliyeed shuruucda khuseysa iyo tallaabooyin maamul, iyadoo looga gol-leeyahay in lagu go'aamiyo ku-filnaanshahooda ku aaddan ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa.

4. Dawladaha Xubnaha ah waxay, si ku habboon oo waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkooda, iska kaashanayaan dhexdooda iyo si khuseysa ururrada caalamiga ah iyo kuwa gobolkeed si kor loogu qaado oo loo horumariyo hab-beegyada lagu tilmaaman Qodobkan. In iskaashiga ay kamid noqonayaan ka-qeyb-galka barnaamijyada iyo mashaariicda caalamiga ah ee looga gol-leeyahay hortagga musuq-maasuqa.

## **QODOBKA 6<sup>AAD</sup>**

### **GUDDI AMA GUDDIYO KA-HORTEGID LA-DAGAALLAN MUSUQ-MAASUQ**

1. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay, si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, xaqiijinaysaa jiritaanka Guddi ama Guddiyo,

sida ugu habboon, oo ka hortaga musuq-maasuqa si ku aaddan hannaankaas sida:

(a) Dhaqan-gelinta siyaasadaha lagu xusay Qodobka 5<sup>aad</sup> ee Heshiiskan iyo, halka ku habboon, kor-joogteynta iyo iskuduwidda hirgelinta siyaasadahaas; iyo

(b) Kordhinta iyo faafinta aqoonta ku saabsan la-dagaallanka musuq-maasuqa.

2. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay siinaysaa Hay'adda ama Hay'adaha ku xusan Faqradda 1<sup>aad</sup> ee isla Qodobkan madax-bannaanida lagama-maarmaanka u ah, si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, si awood loogu siiyo Guddigaas ama Guddiyaashaas in hawlahooda u gutaan si wax-ku-ool ah kana xor ah saameyn kasta oo aan loo baahnayn, waxaana loo baahan yahay in loo oggolaado helidda agab iyo shaqaale takhasus leh, sidoo kale waxyaabaha ay u baahan yihiin shaqaalahaas oo uu kamid yahay tababar si ay waajibaadkooda ugu gutaan sida looga baahnaa.

3. Dawlad kasta oo Xubin ah waa in ay gaarsiisaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay magaca iyo cinwaanka Hay'adda ama Hay'adaha hay'adda ama mas'uuliyiinta laga yaabo in ay ka caawiyaan dawladaha kale ee xubnaha ka ah heshiiskan hormarinta iyo hirgelinta tallaabooyinka gaarka ah oo looga hortagayo musuq-maasuqa.

## **QODOBKA 7<sup>AAD</sup>**

### **QEYBTA DADWEYNAHA**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay, halka ku habboon iyo si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, ku dadaalaysaa in ay dejiso, sugto, oo xoojiso nidaamyada ku aaddan shaqaaleysiinta, qoridda, haynta, dallacsiinta iyo hawl-gabnimada shaqaalaha rayidka ah iyo, halka ku habboon, saraakiisha dadweynaha ee kale ee aan la dooran:

(a) Taasi waxay ku saleysan tahay mabaadi'da wax-ku-oolnimo, daah-furnaanta, shuruuda hadafka sida mudnaanta, sinnaanta iyo kartida;

(b) Waxay isugu jirtaa hab-raacyo ku habboon xulashada iyo tababarka shakhsiyaadka si loogu wareejiyo jagooyinka dawliga ah ee loo tixgelinayo in ay tahay musuq-maasuq si gaar ah iyo in la hubiyo in loo magacaabay jagooyinka markii loo baahnaa;

(c) Waxay ku dhiirri-gelinaysaa in ay helaan mushaar ku filan oo si siman loo bixiyey iyadoo la raacayo heerka horumarka dhaqaale ee Dawladda Xubinta ah; iyo

(d) Waxay ku dhiirri-gelinaysaa in loo sameeyo aqoon-kororsi iyo tababar si ay ugu suurto-gasho shaqaalahaas in ay u gutaan waajibaadkooda shaqo oo ay u hayeen bulshada sida saxda ah, sharaf leh, waxqabad wanaagsan, iyo in loo oggolaado in ay helaan tababar gaar ah oo ku habboon si ay u helaan wacyi-gelin buuxda khatarta musuq-maasuqa ka dhex-jira shaqadooda Barnaamijyada noocan ah waxay noqon karaan tixraac iyo hal-beeyo wanaagsan meelaha looga dhaqmo sharcigan.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waa in ay tixgelisaa qaadashada sharci-dejin ku habboon iyo tallaabooyin maamul oo waafaqsan ujeeddadooyinka heshiiskan iyo si waafaqsano mabaadi'da asaasiga ah ee sharcigeeda gudaha, si loo qeexo shuruuda khuseysa musharaxnimada iyo doorashada xafiis dadweyne.

3. Dawlad kasta oo xubin ka ah heshiiskan waa in ay tixgelisaa qaadista tallabooyin sharci-dejin iyo maamul ee ku habboon si joogta ah iyadoo raacaysa ujeeddooyinka heshiiskan iyo si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah sharcigeeda gudaha, si kor loogu qaado daah-furnaanta maal-gelinta musharaxiinta ee loo doortay xafiis dadweyne iyo, halka ku habboon, maal-gelinta axsaabta siyaasadeed.

4. Dawlad kasta oo xubin ah si waafaqsan mabaad'ideeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda waxay isku dayeysaa in ay qaadato, joogteyso oo xoojiso nidaamyada dhiirri-gelinaya daah-furnaanta iyo ka-hortagga khilaafaadka danahooda

## **QODOBKA 8<sup>AAD</sup>**

### **XEERARKA ANSHAXA EE SARAAKIISHA DADWEYNAHA**

- 1- Si loola dagaalamo musuq-maasuqa, Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ka shaqeyneysaa hormarinta daah-furnaanta, amaanada iyo si ay ku dheehan tahay mas'uuliyad shaqaalaheeda dhexdooda si waafaqsan mabaad'ideed asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda.
- 2- Si gaar ah Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ku dadaaleysaa in ay ku dabaqdo nidaamyadeeda hay'adeed iyo mid sharciyeed ,xeerarka iyo hal-beegyada wanaagsan si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo oo ay u hayeen bulshada sida saxda ah



- 3- Ujeeddada fulinta faqrada qodobkan Dawlad kasta oo Xubin ah iyadoo raacaysa mabaad'ideeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda in ay fiiro gaar ah u yeelato dadaalada xiriirka la leh oo ay qaadanayaan ururada gobolka iyo gobolada kala duwan sida xeerka anshaxa-marinta caalamiga ah ee shaqaalaha dawladda oo ku jira lifaaqa qaraarka guud ee dib-u-heshiisiinta 15/59 12/ December 1996.
- 4- Dawlad kasta oo Xubin ah iyadoo raacaysa mabaad'ideeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda, waa in ay tixgelisaa abuurista tallaabooyin iyo nidaamyada lagu fududeenayo soo-gudbinta mas'uuliyiinta Dawladda ee ku dhaqaaqa musuq-maasuqa ,hay'adaha awoodda uleh, marka ay falalka noocaan oo kale ah ay ku ogaadaan gudashada waajibaadkooda.
- 5- Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ku dadaaleysaa si waafaqsan mabaad'ideeda asaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda in ay dejiso hal-beegyada iyo nidaamyada ku waajibnaayo shaqaalaha dawladdaas loogu muujiyo hay'adaha loo xilsaaray waxyaabo qaarkood oo ay ku jiraan waxqabadkooda dibadda, maal-gashiga, tabarucaada, faa'iidooyin badan oo u horseedi kara isku-dhac danta shaqadooda shaqaale dawladeed ahaan .
- 6- Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ku dadaaleysaa si waafaqsan mabaad'ideeda asaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda in ay qaado anshax-marinta iyo tallaabooyin kale oo ka dhan ah shaqaalaha dawladda kuwaasoo ku xad-gudbay xeerarka iyo hal-beegyada lagu asaasay xeerkan si waafaqsan qodobkan.

### **QODOBKA 9<sup>AAD</sup>**

#### **SOO-GADASHO GUUD IYO MAAREYNTA DHAQAALAHADA DADWEYNAHA**

Dawladda kasta oo Xubin ah si waafaqsan mabaadi'deeda asaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda, waxay qaadeysaa tallabooyinka lagama-maarmaanka ah si loo abuuro nidaamyada ku habboon wax-soo-gadashada, kuna saleysan daah-furnaanta, tartanka iyo ujeeddada dhabta ah ee go'aan-qaadashada, kuwaasoo wax-ku-ool ah, kana hortegayo musuq-maasuqa, nidaamyada noocaan ah oo tixgelin kara qiimeynta heerka ugu habboon ee codsigooda, waxaa kamid ah arrimaha soo socda:

(a) qeybinta xogta la xiriirta hab-raacyada iyo heshiisyada wax-gadashada oo ay ku jiraan warbixinnada ama dukumintiyada xiriirka la leh heshiisyada, casuumaadaha ka-qeyb-galka, warbixinnada la xiriira heshiiska ama bixinta qandaraasyada, oggolaashaha suurto-galka ah ee qandaraasleyaasha iyadoo la siinayo waqti ku filan oo ay ku diyaariyaan kuna soo gudbiyaan qandaraasyadooda;

(b) in horay loo sii sameeyey loona baahiyey shurudaha ka-qeyb-galka oo

ay kamid yihiin xulashada iyo shuruudaha abaal-marinta ‘xeerarka hindisaha yareynta;

(c) adeegsiga ujeedooyinka iyo shuruudaha horay loo qorsheeyey si loo qaato go'aan la xiriira wax-soo-gadashada dawladeed, oo loo fududeeyo xaqiijinta adeegsiga saxda ah ee xeerarka ama hab-raacyada;

(d) in la sameeyo Nidaam wax-ku-ool ah oo dib-u-eegis gudaha ah, oo ay ku jirto nidaamka rafcaan-qaadashada, si loo hubiyo waddo sharci ah oo lagu gudbiyo cabashada iyo dib-u-hagaajinta haddii ay dhacdo in la raaci waayo xeerarka ama hab-raacyada loo dejiyey sida ku xusan faqraddan; iyo

(e) in la qaado tallabooyin wax-ku-ool ah markii loo baahdo si loogu habeeyo arrimaha xiriirka la leh shaqaalaha mas'uulka ka ah soo gadashada, sida in la ogeysiyo maslaxad kasta oo ku jirta in dawladda ay soo gadato waxyaabo gaar ah iyo hab-raaca baaritaannada iyo baahiyaha tababarka.

2. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay qaadeysaa si waafaqsan mabaadi'deeda asaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda tallaabooyinka ku habboon si kor loogu qaado daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka maamulka maaliyadeed ee dawladda. Tallaabooyinka noocan oo kale ah waa inay ka kooban yihiin waxyaabahan soo socda:

- (a) hab-raacyada ee ku tiirsan tahay miisaaniyadda dawladda;
- (b) In si ku-meel-gaar ah looga warbixiyo dakhliga soo galay iyo kharashaadka ka baxay ;
- (c) Nidaamka xisaabaadka iyo hal-beegyada heerarka xisaabinta iyo kormeerka la xiriira;
- (d) Nidaamyada wax-ku-oolka ah ee saameynta leh ee la xiriira maareynta halista ah iyo xakameynta gudaha; iyo
- (e) in ay qaado markay ku habboon tahay, tallaabo sixitaan ah oo ku saabsan dacwadaha lagu guul-daraysto in loo hoggaansamo shuruudaha lagu asaasay faqraddan 3. dawladda kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa talaabooyin madani iyo mid maamul intaba, iyadoo la raacayo mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda , si loo ilaaliyo bad-qabka buugaagta xisaabaadka, diiwaannada, bayaannada maaliyadeed ama dukumiintiyo kale ee la xiriira kharashka dawladda iyo dakhliga iyo in laga hortago been-abuurka dukumintiyada noocan oo kale ah.

## **QODOBKA 10<sup>AAD</sup>**

### **WARBIXINTA DADWEYNAHA**

Iyadoo la tixgelinayo baahida loo qabo la-dagaallanka musuq-maasuqa, Dawlad kasta oo xubin ka ah heshiiskan, si waafaqsan mabaadi'deeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda, waxay qaadeysaa tallaabooyinka lagama-

maarmaanka u ah in kor loogu qaado daah-furnaanta maamulkeeda dawladeed, oo ay kamid tahay qaabka ay u nidaamineyso hawladeeda, shaqaaleysiinta iyo go'aan-qaadashadeeda iyadoo la tixraacayo markii loo baahdo tallaabooyinka noocan oo kale ah waxaa kamid noqon kara:

- (a) ku-tiirsanaanta hab-raacyo ama xeerar u oggolaanaya dadka oo dhan in ay helaan, macluumaad ku saabsan qaabka ay u nidaamineyso hawladeeda, shaqaaleysiinta iyo go'aan-qaadashadeeda iyadoo la tixraacayo markii loo baahdo Tallaabooyinka noocan oo kale ah , shaqeynta iyo geedi-socodka go'aan-qaadashada ee maamulkeeda iyadoo la ixtiraamayo ilaalinta macluumaadka gaarka ah iyo macluumaadka shakhsiga, go'aanada iyo ficillada sharciga ee walaac ka muujinaya xubnaha dadweynaha;
- (b) fududaynta nidaamyada maamul, markii loo baahdo, si loogu fududeyo dadweynaha gaaritaanka hay'adda awoodda uleh ee go'aanka qaadaneyso; iyo
- (c) baahinta macluumaadka, oo ay kujirto warbixino xilliyeed oo kusaabsan halista Musuq-maasuqa uu ku leeyahay maamulkiisa dawladeed.

### **QODOBKA 11<sup>AAD</sup>**

#### **HAL-BEEGYADA LA XIRIIRA GARSOORKA IYO ADEEGYADA DACWAD-OOGISTA**

1. Iyadoo maanka lagu hayo madax-bannaanida Garsoorka iyo tallaabooyinka muhiimka ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa, dawlad kasta oo xubin ah waxay si waafaqsan Mabaadi'da Asaasiga ah ee Nidaamkeeda sharci ee aan ka hor-imaanaynin madax-bannaanida Garsoorka, waxay qaadaysaa tallaabooyin lagu xoojinayo ee looga hortagayo fursadaha musuq-maasuqa ee xubnaha Garsoorka. Tallaabooyinka noocan oo kale ah waxaa kamid noqonaya Xeererka la xiriira Anshaxee Xubnaha Garsoorka.
2. Tallaabooyinka la qaaday iyadoo la raacayo faqradda (1) ee qodobkan, waxaa lagu soo bandhigayaa laguna dabaqayaa adeegga dacwad-oogista ee Dawladaha Xubnaha ah taasoo aysan kamid aheyn qeybta Garsoorka laakiin waxay xaq u yeelanayo madax-bannaani la mid ah Adeegga Garsoorka.

### **QODOBKA 12<sup>AAD</sup>**

#### **HAY'ADAHA GAARKA AH**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa talaabooyin ku saleysan mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucdeeda, si looga hortago musuq-maasuqa la xiriira hay'adaha gaarka ah, xoojinta xisaabinta iyo hal-beegyada hanti-

dhawridda ee hay'adaha gaarka ah iyomarka ay ku habboon tahay bixinta wax-ku-ool ah ee saami-qeybsiga iyo ganaaxyada madaniga ah, maamulka ama ciqaabta fal-dembiyeedyadaciqaabta dembiyada ee ku guul-dareysiga u hoggaansanaanta tallaabooyinka noocaas ah.

2. Tallaabooyinka lagu gaarayo ujeedooyinkan waxaa kamid noqonaya:-

(a) dhiirri-gelinta wada-shaqeynta hay'adaha sharci-fulinta iyo hay'adaha gaarka

ah;

(b) dhiirri-gelinta horumarinta hal-beegyada iyo hab-raacyada loogu tala-galaydhawridda Hufnaanta hay'adaha gaarka ah oo ay ku jiraan Xeerarka anshaxa ee dhaqan-galka ah, sharafta iyo wax-qabadka saxda ah ee hawlaha ganacsiga iyo dhammaan xirfadaha la xiriira iyo ka-hortagga khilaafaadka danaha, iyo sare u-qaadista adeegsiga dhaqamada ganacsiga wanaaga ee ganacsatada dhexdooda iyo xiriirka qandaraas ee ganacsatada Dawladda;

(c) dhiirri-gelinta daah-furnaanta hay'adaha gaarka ah oo ay ku jirto marka ay ku habboon tahay tallaabooyinka la xiriira aqoonsi sharci iyo dadka caadiga ah ee ku lug leh Asaasidda iyo maareynta Iskaashiga hay'adaha;

(d) ka-hortagga si xun u adeegsiga nidaamyada lagu maamulayo hay'adaha gaarka ah oo ay ku jiraan habr-aacyada ku saabsan kaabida iyo shatiyadaay siiso dawladdu hawlaha Ganacsiga;

(e) ka-hortagga khilaafaadka danaha soo rogaya xayiraad, sida ku habboon ee waqtiga macquulka ah, hawlaha xirfadeed ee saraakiishii hore ee dadweynaha ama shaqaaleysiinta saraakiisha dadweynaha ee hay'adaha gaarka ah kaddib marka ay is casilaan ama hawl-gab noqdaan, marka ay hawlahaas ama shaqooyinkasi toos ula xiriiraan Hawlaha ay hayaan ama kormeerayaan saraakiisha dadweynaha muddadii ay xilka haayeen;

(f) hubinta hay'adaha gaarka ah iyadoo tixgelinayo qaab-dhismeedka iyo cabirka

ay leeyihiin kontarool hanti-dhawra gudaha ah oo ka caawinayso ka-hortagga iyo oggaanshaha falalka musuq-maasuqa iyo akoonnada iyo warbixinnada maaliyadeed ee loo baahan yahay ee hay'adaha gaarka ah oo ay ku xiran yihiin hanti-dhawridda ku habboon iyo hab-raacyada shahaadada.

3. Si looga hortago musuq-maasuqa, dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa

tallaabooyinka ku habboon, iyadoo la raacayo shuruucdeeda iyo Xeer-hoosaadyadeeda la xiriira dib-u-habeynta dukumintiyada iyo diiwaannada, saacinta warbixinada maaliyadeed iyo xisaabinta iyo hal-beegyada hanti-

dhawridda, si loo reebo falalka soo socda ee lagu fuliyey ujeeddada mid kamid ah dembiyadii lagu asaasay si waafaqsan heshiiskan.

- (a) asaasidda xisaabaadka ka baxsan buugaagta;
- (b) saameynta buugaagta ka baxsan ama aan ku filnayn macaamil ganacsi lacageed;
- (c) diiwaan-gelinta kharashaad aan jirin;
- (d) soo-gelitaanka deymo leh aqoonsi aan sax aheyn ee sheeyadooda;
- (e) adeegsiga dukumiintiyada beenta ah; iyo
- (f) u burburinta si ula kac ah dukumiintiyada keydsan ee horay sharcigu u sheegay.

4. Dawlad kasta oo xubin ah waxay u diidaysaa canshuur-dhimista kharashyada inay noqdaan laaluush, tan waa mid kamid ah waxyaabaha tiirarka u ah dembiyada lagu asaasay si waafaqsan qodobbada 15 iyo 16 ee heshiiskan iyo, marka ay ku habboon tahay, kharashyada kale ee la xiriira wanaajinta anshaxa.

### **QODOBKA 13<sup>AAD</sup>**

#### **KA-QEYB-GALKA BULSHADA**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa talaabooyinka ku habboon oo waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucdooda, si kor loogu qaado ka-qeyb-galka shakhsiyaadka firfircoon iyo kooxaha ka baxsan hay'adaha dadweynaha, sida bulshada rayidka, ururada aan-dawliga ahayn iyo ururada ku saleysan bulshada ee ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo in kor loo qaado wacyi-gelinta dadweynaha ee xiriirta jiritaanka, sababaha iyo baaxadda iyo khatarta uu leeyahay musuq-maasuqa. Ka-qeyb-galeyaasha waa in lagu xoojiyaa tallaabooyinkan:
  - (a) Kobicinta daah-furnaanta iyo kor-u-qaadista ka-qeyb-galka dadweynaha ee Hawlaha go'aan-gaarista;
  - (b) Hubinta in dadweynuhu ay si wax-ku-ool ah u helaan xogta;
  - (c) Qadashada macluumaadka hawlaha dadweynaha ee ka-qeyb-galka dulqaad-la'aanta musuq-maasuqa iyo sidoo kale barnaamijyada waxbarashada dadweynaha, oo ay ku jiraan manhajka dugsiyada iyo jaamacadaha;
  - (d) Ixtiraamka, kobicinta iyo ilaalinta xorriyadda raadinta, helitaanka, Daabicidda iyo faafinta macluumaadka khuseeyo musuq-maasuqa. Xorriyaddaas waxaa laga yaabaa inay ku xirnaato xannibaado gaar ah, laakiin kuwan waxaa kaliya oo ay noqon karaan kuwa sharcigu siiyey oo lagama-maarmaanka ah:-

- (i) in la ixtiraamo xuquuqaha ama sharafta dadka kale; iyo
- (ii) Ilaalinta amniga qaranka ama dib-u-dhac ku yimid ama caafimaadka guud ama akhlaaqda.

2. Dawlad kasta waxay qaadaysaa tallabooyinka ku habboon si loo hubiyo in guddiga la-dagaallanka musuq-maasuqa ee lagu xusay heshiiskan inay og'yihiin dadweynaha iyo bixinta waxyaalaha ay heli karaan guddigaas, marka ay ku habboon tahay warbixinta oo ay iskugu jirta si qarsoodi ah, dhacdooyin kasta oo loo arki karo inay yihiin fal-dembiyeed lagu asaasay si waafaqsan Heshiiskan.

### **QODOBKA 14<sup>AAD</sup>**

#### **HAL-BEEGYADA LOOGA HORTAGAYO LACAG-DHAQIDA**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay sameynaysaa:
  - (a) nidaamyada sharci-dejin oo dhammeystiran iyo nidaam kormeer oo loogu talo-galay bankiyada iyo hay'adaha maaliyadeed ee aan ahayn bankiyada, oo ay ku jiraan shakhsiyadka caadiga ah ama kuwa sharciga ah ee bixiya adeegyo rasmi ah ama aan rasmi ahayn xagga gudbinta lacagta ama qiimaha iyo, marka ay ku habboon tahay, guddigayd kale gaarka ah ee u nugul lacag-dhaqida oo aan u laheyn Awood-xirfadeed, si looga hortaggo loona ogaado dhammaan noocyada lacag-dhaqida, marka la xoojinayo shuruudaha macaamilka iyo marka ay ku habboon tahay, aqoonsiga milkiilaha wax-tarka leh, diiwaan-gelinta iyo soo-gudbinta warbixinta macaamil ganacsi laga shakiyey; iyo
  - (b) iyadoo aan ku xad-gudbeyn qodobka 46<sup>aad</sup> ee Heshiiskan, inay hubiso maamulka, sharciyada, fulinta sharci iyo awoodaha kale u heellan la-dagaallanka lacag-dhaqida (oo isugu jirto, marka ay ku habboon tahay shuruucdooda Awoodaha Garsoorka) waxay awood u yeelanayaan iskaashi iyo is-dhaafsi macluumaadka heer Qaran iyo kuwa caalamiga ah marka loo eego shuruudaha u dagan shuruucdeeda, waxay tixgeliyaasaa asaasidda Qeyb Sir-doon-maaliyadeed oo u adeegaysa sidii xarun Qaran oo loogu talo-galay ururinta, falanqeynta iyo faafinta macluumaadka la xiriira lacag-dhaqida.
2. Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgeliyaasaa hirgelinta hab-beegyada macquul ah oo lagu ogaanayo laguna kormeerayo dhaqdhaqaaqa lacagta caddaanka ah iyo aaladaha gorgortanka ku habboon ee laga gudbinayo xuduudahooda, iyadoo dhawraysohubinta adeegsiga macluumaadka saxda ah oo aan wax

loogu dhimeyn dhaqdhaqaaqa raasamaalka sharci dhan kasta. Hal-beegyada noocan oo kale ah waxaa kamid noqonaya shuruud ah shakhsiyaadka looga baahan yahay iyo ganacsatada iyo in ay ka soo warbixiyaan ka gudbinta xuduud lacag fara badan oo caddaan ah iyo aaladaha gorgortanka ku habboon.

3. Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelinayaan hirgelinta hal-beegyada loogu baahan yahay hay'adaha-maaliyadeed, oo ay ku jiraan kuwa xawaaladaha lacagta:
  - (a) Ku darista foomamka wareejinta elektarooniga ee lacagaha iyo wixii la xiriira farriimaha saxda ah iyo macluumaad macno leh oo asal ah;
  - (b) In la ilaaliyo macluumaadkaas inta lagu gudo-jiro silsiladda bixinta; iyo
  - (c) Isticmaalidda baaritaan kor loogu qaadaayo wareejinta lacagaha aan ku jirin macluumaad dhammeystiran oo ku saabsan asalkii.
4. Asaasidda nidaamyo sharci iyo kormeerid iyadoo la raacayo qodobkan iyo qodobbda kale ee heshiiskan, Dawladaha Xubnaha ah waxaa loogu yeerayaa in ay u isticmaalaan hagidda dadaallada la xiriira gobolka, inta u- dhaxeysa gobolada iyo ururro badan ee ka shaqeeya la-dagaallanka lacag-dhaqida.
5. Dawladaha Xubnaha ah waxay ku dadaalayaan horumarinta iskaashiga caalamiga ah, gobolka iyo iskaashiga laba dhinac ee Garsoorka, fulinta sharciga iyo sharci-dejinta maaliyadeed si loola dagaallamo lacag-dhaqida.

### **CUTUBKA III DEMBIYEYNTA IYO FULINTA SHARCIGA**

#### **QODOBKA 15<sup>AAD</sup>**

#### **LAALUUSHKA SARAAKIISHA DADEWEYNAHA EE QARANKA**

Dawlad kasta oo Xubin ah waxay qaadaysaa sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboonee lagu caddeynayo fal-dembiyeed marka si ula kac ah loo geysto:

- (a) Ballan-qaadkala siinayo sarkaal dadweyn, si toos ah ama si aan toos ahayn, faa'iido aan caadi aheyn, sarkaalka naftiisa ama nafteeda ama qof kale ama hay'ad, in uu noqdo fal rasmi ama ka fogaado falka. inta uu ku gudo-jiro isaga ama ayada waajibaadkooda rasmiga ah; iyo
- (b) codsiga ama oggolaansaha sarkaal dadweyne, si toos ah ama si dadban, Faa'iido aan caad ahayn, sarkaalku nafsdiisa ama nafteeda ama qof kale ama

hay'ad, si uu u noqdo fal rasmi ah ama ka fogaado falka inta uu ku gudo-jiro isaga ama ayada waajibaadkooda rasmiga ah.

#### **QODOBKA 16<sup>AAD</sup>**

##### **LAALUUSHKA SARAAKIISHA DADWEYNAHA EE SHISHEEYE IYO SARAAKIISHA DADWEYNAHA EE URURRADA CAALAMIGA AH**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed marka si ula kac ah loo galo, ballan-qaadka la siinayo sarkaal dadweyn ee shisheeye ama sarkaal ka tirsan ururrada caalamiga ah, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi ahayn, sarkaalku nafsadiisa ama nafsadeeda ama shakhsi kale ama hay'ad, si uu falka u noqdo rasmi ama ka fogaado falkainta uu ku guda jirto isaga ama ayada waajibaadkooda rasmiga ah, si uu u helo ama u sii haysto ganacsi ama faa'iidooyinka kale ee aan caadi ahayn oo la xiriira dhaqanka Caalamiga ah.
2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale eek u habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, markii si ula kac ah loo galay, codsashada ama oggolaanshaha sarkaal dadweyn shisheeye ama sarkaal ka tirsan hay'ad caalamiga ah, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi ahayn, sarkaalka naftiisa ama nafteeda ama shakhsi kale ama hay'ad, si uu u noqdo falka rasmi ah ama ka fogaado falka inta uu ku guda-jiro isaga ama iyada waajibaadkooda rasmiga ah.

#### **QODOBKA 17<sup>AAD</sup>**

##### **KHAYAANO LUNSASHO AMA WAREEJIN KALE EE HANTI UU LEEYAHAY SARKAAL DADWEYNE**

Dawlad kasta oo xubin ah wuxuu qaadaysaa sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon, ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, markii si ula kac ah loo galo, khayaano, lunsasho ama wareejin kale ee sarkaal dadweyne isaga ama iyada faa'iido ama faa'iido qof kale ama hay'ad, hanti kasta ee guud ama hanti gaar ah ama amniga ama wax kasta oo qiimo leh oo lagu aaminay sarkaalka dadweyne, iyadoo loo maleynayo jagadiisa isaga iyo iyada Samo-fale.



**QODOBKA 18<sup>AAD</sup>**  
**SAAMEYNTA GANACSIGA**

Dawlad kasta waxay tixgelinaysaa qaadista sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed markii si ula kac ah loo geysto:

(a) Ballan-qaadka, la siinayo sarkaal dadweyne ama qof kale, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi aheyn uu amray sarkaal dadweyne ama qof lagu xad-gudbay isaga ama iyada ama saameyn suurta-gal ah, iyadoo ujeeddadu tahay in la helo maamul ama awood dawladeed ee dawlad xubin ka ah faa'iidooyin aan caadi ahayn oo ku saabsan falka asalka ah ama qof kasta oo kale; iyo

(b) Codsashada ama aqbalaadda sarkaal dadweyn ama qof kale, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi ahayn naftiisa ama nafteeda ama qof kale uu amray sarkaal dadweyn ama qof lagu xad-gudbay isaga ama iyada ama saameyn suurta-gal ah, iyadoo ujeeddadu tahay in laga helo maamul ama awood dawladeed ee dawlad xubin ka ah faa'iido aan caadi ahayn.

**QODOBKA 19<sup>AAD</sup>**  
**KU XAD-GUDUBKA SHAQOYINKA**

Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa sharci-dejint kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, marka si ula kac ah loo galo, ku xad-gudubka shaqooyinka ama boosaska, taasi waa, waxqabadka ama ku guul-dareysiga saameyn fal, ku xad-gudubka shuruucda, ee sarkaal dadweyne marka laga saaro shaqadiisa isaga ama iyada, ujeeddaduna tahay helitaanka faa'iido aan caadi ahayn naftiisa ama nafteeda ama qof kale ama hay'ad.

**QODOBKA 20<sup>AAD</sup>**  
**SAAMEYNTA SHARCI-DARRADA AH**

Iyadoo la tixraacayo Dastuurka iyo mabaadii'da asaasiga ah ee nidaamkeeda sharciga, Dawlad kasta oo xubin ah, waxay tixgelinayaa sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboonee lagu caddeynayo fal-dembiyeed markii si ula kac ah loosoo galo, Saameynta Sharci-darrad ah, taasi waa siyaado kasta oo muhiim ah Hantida ee sarkaal dadweyne isaga ama iyada si macquul ah uma sharxi karto macluumaad ku saabsan dakhligiisa sharciga ah isaga/iyada.

## **QODOBKA 21<sup>AAD</sup>**

### **LAALUUSHKA HAY'ADAHA GAARKA AH**

Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa sharci-dejint kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, marka si ula kac ah loogu galo hawlaha dhaqaalaha, maaliyada ama hawlaha ganacsiga:

(a) Ballan-qaadka, la siinayo, si toos ah ama si dadban faa'iido aan caadi aheyn qof

kasta oo hagaya ama ka shaqeyanaya, awoodiisiinta hay'ad gaar ah, qofka naftiisa ama nafteeda ama qof kale, si uu u jebiyo waajibaadkiisa ama u joojiyo fal; iyo

(b) Codsashada ama aqbalaadda, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi aheyn qof kasta oo hagaya ama ka shaqeeya, awood-siinta hay'ad gaarka ah qofka laftiisa ama nafteeda ama qof kale, si uu u jabiyo waajibaadkiisa, ama u joojiyo fal.

## **QODOBKA 22<sup>AAD</sup>**

### **LUNSASHADA HANTIGA SHIRKADAHA GAARKA LOO LEEYAHAY**

Dawladda Xubinta ah Heshiiska waxay tixgelinaysaa dhaqan-gelinta Shuruucda iyo hal-beegyada kale oo ku habboon in la asaaso xad-gudubyada Dembileyaasha oo kale, marka lagu galay si Caalami ah xaalada dhaqaale, Maaliyadeed ama hawlo ganacsi, uu lunsaday Shakhsiga Agaasimaha ka ahaa ama ka shaqeeynayey, Awood kasta, hanti kasta oo ay laga leedahay Hay'ad Sharci ku dhisan, hanti gaar ah ama mid Amni, iyo walxo kale oo qiimo leh oo lagu aaminay asaga/iyada oo looga faa'iideystay Xilkiisa ama xilkeeda.

## **QODOBKA 23<sup>AAD</sup>**

### **DHAQIDA FAA'IIDADA LAGU HELAY FAL-DEMBIYEEDKA**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa si waafaqsan Mabaadi'da asaasiga ah ee Xeerarka dalka sida Shuruuxda iyo hal-beegyada kale oo ku habboon in la asaaso falal Xad-gudub ah marka lagu galo si caalami ah:
  - a) (i) heshiiska ama Xawilaada Hantida iyagoo xog ogaal loo yahay hantidaas in laga faa'iidey fal-dembiyeed ujeedadiisu tahay in la qariyo, ama lagu dhex-mile hantida Asalka ah mida Sharci-darada ah si looga caawiyo qof kasta oo qeyb ka ah Amarada falalka fal-dembiyeedka laga dhigay, si uu uga fogaado natijada tallaabada sharci .  
(ii) qarinta ama ku dhex-melida si qaab sax ah, Ilaha, goobta, hab-dhaqanka, dhaqdhaqaaqa ama Xuquuqda milkiilaha ay ku jirto Xushmada Hantida iyadoo la ogaanayo hantidaas in laga faa'iiday fal-dembiyeed;
  - b) Nuxurka oo lagu saleyey u-hoggaansanka nidaamka Sharciga;

- (i) Soo gadshada iyo Milkiyada ama isticmaalka Hantida, iyadoo la ogyahay Mudda qoraalka qaan-sheega la qaatay, hantidaas oo ah faa'iido lagu helay fal-dembiyeed;
  - (ii) Ka-qeyb qaadashada, lala xiriiriyey ama shirqool la galay, isku day galid dembi, ama gacan kasiin, fududeyn ama qarinta lagu galay Xad-gudubyo oo fal-dembiyeed ka dhigaya sida ku xusan qodonkan,
2. Iyadoo ujeeddadu tahay dhaqan-gelinta faqradda (1) ee qodobkan:
    - Dawladda kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa Faqradda (1) ee Qodobkan si loo faafiyo Xaddiga fal-dembiyeedka loo cuskaday
    - a. Dawladda Xubnaha aka ah waxay kusoo darayaa fal-dembiyeedyada loo cuskaday ugu yaraan Darajada wadajirka ah ee Xad-gudubyada Dembeelaha taasoo lagu xusay heshiiskan;
    - b. Iyadoo ujeeddadu tahay faqrad-hoosaadka (b) ee kore fal-dembiyeedka ee loo cuskaday waxaa in fal-dembiyeed la galay labo jeer si wadjir ah iyo meel ka baxsay Xuduud-dhuleedka Dawladda Xubnaha ka ah iyadoo ka dhigayo Fal-dembiyeed loo cuskaday oo kaliya marka lala xiriiriyo hab-dhaqan ee fal-dembiyeedka si waafaqsan Shuruucda dalka lagu galay Fal-dembiyeedka oo ay tahay in loo tixgeliyo Fal-dembiyeed si waafaqsan Shuruucda Dalka ee Dawladda xubinta ka ah Heshiiska, dhaqa-gelinta iyo dabaqaada qodobkan sidii fal-dembiyeedka uu halkaas ka dhacay oo kale:
    - c. Dawladda kasta oo xubin ah, waxay siinaysaa nuqul shuruucdeeda kamid ah siismadaas waxay saameynaysaa qodobkan iyo Xaaladaha isbeddelaya ee ku addan shuruucdaas iyo tilmaamaha kazoo baxa Xoghaye Guud ee Qaramada Midoobay:
    - d. haddii loo baahdo Mabaadi'da asaasiga u ah shuruucda Dalka ee Dawladda xubinta ka ah Heshiiska waa suurta-gal ah inay keento fal-dembiyeedyada ku xusan faqradda (1) ee qodobkan laguma dabaqayo shakhsiyaadka galay Fal-dembiyeedka asalka ah.

## **QODOBKA 24<sup>AAD</sup>**

### **QARIN**

Iyadoo aan wax loo dhimeynin faqrada Qodobka 23aad ee heshiiskan, Dawladda kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa Dhaqan-gelinta Shuruudahaas iyo Hal-beegyada kale oo ku habboon oo si fal-dembiyeed looga dhigo, marka lagu galo si niyad, marka la galo fal-dembiyeed oo dembi ka dhigayo si waafaqsan Heshiiskan, iyadoo aan la haynin cid ka qeyb-qaadatay fal-

dembiyeedka, Qarinta ama la xiriira hantida la lunsaday, marka shakhsiga qeybta ka ah ogyahay hantidaas tahay faa'iiday lagu helay fal-dembiyeed, sida ku xusan heshiiskan.

### **QODOBKA 25<sup>AAD</sup>**

#### **IS-HORTAAGA GEEDI-SOCODKA CADAALADDA**

Dawlad kasta oo Xubinta ah waxay dabaqaysaa Shuruucdaas iyo hal-beegyadooda taasoo ku habboon ee Dembi ka dhigida fal-dembiyeedka haddii loo galo si ku tallo-gal ah:

(a) isticmaalka Awood-jireed ah ama hanjbaad, cabsi-gelin, Balan aaddan Mudnaan aan Xaq loo yeelan, soo-bandhgid ama bixinta Ballan-qaad ku aaddan in la galo Markhaati-beenaad, iyo in faro-gelin lagu sameeyo gudasho markhaatiga ama gubinta Caddeymo in lagal hab-raacyo xiriir la leh falal laga dhigay dembi si waafaqsan heshiiskan:

(b) isticmaal Awood-jireed, handadaad iyo cabsi-gelin in la faro-gelin lagu sameeyo hawlaha Shaqaale Garsoor, ama saraakiisha Fuliyeaasha Sharciga oo lala xiriiriyo galay Fal-dembi laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan, iyadoo aan wax loo dhimeynin faqrad hoosaadkan, Dawladda xubinta ka ah Heshiiska waxay xaq u yeelanaysaa in ay sameystaa Shuruuc, taasoo ilaalinaysa Xubnaha kala duwan ee Shaqaalaha Dadweynaha ah.

### **QODOBKA 26<sup>AAD</sup>**

#### **MAS'UULIYADA SHAKHSIYAADKA SIFO SHARCI LEH**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dabaqeysaa hal-beegyadan sida ku habboon, mabaadi'da Sharci oo lagu kalsoonaan, in Mas'uuliyada Shakhsiyaadka sifo sharci leh oo ka qeyb-qaatay fal-dembiyeedka laga dhigo fal-dembiyeed si waafaqsan Heshiiskan.
2. Mabaadi'da Sharci ee Dawladda Xubinta aka ah waxay u hoggaansameysaa I Shakhsiyaadka Sifo sharci leh ay qaadayaa Mas'uuliyad ay suurta-gal tahay in ay noqdaa Dembeele galay kiis Madini ah ama Maamul;
3. Mas'uuliyeed waxaa laga reebayaa Mas'uuliyda Fal-dembiyeedka uu galo shakhsi caadi ah;
4. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay si gaar ah u hubinaysaa in Shakhsiyaadka leh sifo sharci ay u hogaasameen Mas'uuliyada si waafaqsan qodobkan si wax ku-

ool ah Dembiyada Ciqaabta ah iyo kuwa aan ahayn iyo sidoo kale Dembiyada Maaliyadeed.

### **QODOBKA 27<sup>AAD</sup>**

#### **KA-QEYB-QAADASHADA IYO ISKU-DAYGA**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa Shuruucdan iyo hal-beegyada kale oo ku habboo dembi ka dhigaya fal-dembiyeeka si waafaqsan Shuruucda dalka, ka -qeyb qaadashada awood kasta ah, gacan-kasiin, caawin, ama ku boorin, fal-dembi laga dhigay si waafaqsan heshiiskan.
2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa shuruucdan iyo hal-beegyada kale oo ku habboon oo ka dhigaya Fal-dembiyeed si waafaqsan shuruucda Dalka, isku-day kasta oo lagu galo fal-dembiyeed oo laga dhigay dembi si waafaqsan Heshiiskan.
3. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhqan-gelinaysaa shuruucdan iyo hal-beegyada kale eek u habboon oo dhigaya fal-dembiyeed si waafaqsan Shuruucda Dalka u diyaar-garobida galid Fal-dembiyeed fal-dembi laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.

### **QODOBKA 28<sup>AAD</sup>**

#### **OGAANSHAHA IYO NIYADA UJEEKKA TIIRARKA FAL-DEMBIYEEDKA AHAAN**

Ogaanshaha, niyada ama ujeedka waxay Caddeyn u noqonayaan dhacdooyinka laga shakisan yahay haddii lagu helo tiirarka Caddeymaha in la galay fal dembi laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.

### **QODOBKA 29<sup>AAD</sup>**

#### **XAALADDA XADDIDITAANKA**

Dawlad kasta oo xubin ah, waxay is waafajinayaa shuruucdeeda iyo falalka dembiga laga dhigay si waafaqsan Shuruucda dalka marka Xaaladaha Xaddidan ay kala fog tahay waxaa laga bilaabayaa Hab-raacyada Fal-dembiyeedka laga dhigay si waafaqsan heshiiskan , waxaanna la Xadidayaa Muddo dheer haddii uu Dembiluhu ka fakaday Cadaaladda iyadoo dib loo dhigayo Dacwadda si waafaqsan Heshiiskan.

### **QODOBKA 30<sup>AAD</sup>**

#### **DEMBI-OOGISTA, GAR-NAQIDA IYO CIQAABTA**

1. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay ka dhigayaan gelitaan Falalka dembiga laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan kana ratibmeysa mas'uliyad Ciqaabeed si loo ilaaliyo culeyska uu Dembigaas leeyihiin,
2. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay raacaysaa hal-beegyadaas sida ku habboon si loo ilaaliyo si waafaqsan nidaamka Sharciga, iyo Mabaadi'da Dastuurka iswaafajinta isku-dheeli tirnaanta u dhaxeysa Xasaalanadaha ama Mudnaata Garsoorka oo ay siinayso Shaqaalaha si ay wax uga qabtaan Hawlhooda una gutaan waajibaadkooda sida ugu habboon, si wax-ku-ool ah, Baarinaanka, Dembi-oogista, ama Garsoorida oo ku aaddan Falalka Dembiga laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.
3. Dawlad kasta oo xubin ah waxay damaanad qaadayaan Saameynta waxyaalaha uu sharciga oggolaanayo iyadoo la tixgelinaayo Shuruucda dalka oo ku aaddan Baritaanka shakhsiyaadka galay falka Dembiga laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan, si loo hubiyo in ay fuliyeen Hay'adaha Sharci-fulinta hab-raaca laga qaadanayo fal-dembiyeedka, iyadoo la tixgelinaayaa baahida loo qabo awgeed in laga waantoobo galitaanka fal-dembiyedka sidaan oo kale ah.
4. Xaaladaha Falka Dembiga laga dhigay si waafaqsan heshiiskan, Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa hab-raaca ku habboon si waafaqsan huruucda Dalka, iyadoo la tixgelinayo Xuquuqda Difaaca , si loo hubiyo Dammaanad-qaadka Sharciga looga dhigay in lagu daayo ilaa laga gaarayo Muddada maxkamadeynta ama racfaanka iyadoo lagama-maarmaan ay tahay joogitaanka eedeysanaha si loo raaco Hab-raaca fal-dembiyeedka.
5. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay qaadaysaa ciqaabta ugu culuska ah ee Fal-dembiyeedka ay khuseyso, haddii la tixgelinaayo suurta-galnimada sii-deynta ama Sharciga looga dhigay Shakhsiyaadka ku eedeysan gelitaanka Dembiydaas.
6. Dawlad kasta oo xubin ah, inay is waafigiyaan Mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka Sharciga, iyadoo la tixgelinayo hab-raacyada ku aaddan Shaqaalaha Dadweynha kuwaas oo lagu eedeeyey Falalka Dembiga looga dhigay si waafaqsan Heshiiskan ama in laga joojiyo shaqada ama la beddelo, ama ay casilaan hay'ad awood u leh iyadoo la tixgelinaayo Mabaadi'da Dembi-la'aanta.

7. Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa marka uu culus yahay fal-dembiyeedka waa in la is waafjiyaa mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka Sharci, iyadoo la raacayo hab-raacyada Mas'uuliyad ka qaadida ee amar-maxkamadeed ama macna kale oo u dhigma, muddada ay xadiday shuruucda Dalka, ee ashqaasta ku eedeysan Fal-dembi laga dhigay in la galay si waafaqsan Heshiiskan waana sida soo socota:
  - a) haynta Xafiis dadweyne; iyo
  - b) haynta Xafiis ganacsi qeybi kamid ah ama gabi ahaanba ay leedahay dawladda.
8. Iyadoo aan faqradda (1) ee qodobkan wax loo dhimeynin in la isticmaalo Awood anshax-marin ee Ha'adaha Awoodda u leh ee lidka Shaqaalaha Rayidka ah.
9. Kamid ma ahan heshiiskan wax saameyn ku yeelanaya mabaadi'da Garsoorka, inuu noqdo fal-dembi laga dhigay si waafqsan heshiiskan iyo in lagu dhaqan-gelin karo tilmaamaha difaaca Sharci ama ilaalinta Mabaadi'da kale ee sharciga ee dhawraya hannaanka Shuruucda Dalka ee Dawladda xubinta ka ah Heshiiskan, iyadoo ay jiraan Baaritaan iyo Ciqaabta dembiga si waafqsan shrcigaas.
10. Dawladda xubinta ka ah Heshiiska, waxay ku dhiiri-gelinaysaa in dib-loogu soo celiyo bulshada shakhsiyaadka lagu eedeeyey gelitaanka fal-dembi laga dhigay si waafaqsan heshiiskan.

### **QODOBKA 31<sup>AAD</sup>**

#### **XAYIRAAD, XANNIBAAD IYO LA-WAREEGID**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa si ugu soor-galmida ah ee ugu habboon nidaamkeeda Sharci ee Dalka hab-raacyadaas taasoo ku habboon la-wareegid:
  - a) faa'iido fal-dembiyeed lagu helay eek u aaddan falal heshiiskan uu dembi ka dhigay, ama a hantida qiimihiisa ku dhigma qiimaha Faa'iidada laga helay fal-dembiyeedka; iyo
  - b) hantida, Agabka, aaladaha kale oo loo isticmaalay ama loo diyaariyey in loo isticmaalo fal-dembiyeed si waafqsan heshiiskan.
2. Dawladda xubinta ka ah Heshiiska waxay qaadayaan hal-beegyada si ku habboon si loo suurta-geliyo aqoonsiga, daba-galka, Xayiraada ama Xannibaada ee Agabyada oo ku xusan faqradda (1) ee qodobkan oo ay ujeedadu tahay la-wareegid kama-dambeys ah.

3. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa si waafqsan Shuruucda dalka, Shuruucdaas, iyo Hal-beegyada kale oo ku habboon taasoo suurta-gal ay tahay in ay nidaamiyaan Maalmulka ha'adah Awoodda u leh xayiraada, Xannibaada ama la-wareegidda hantida sida ku xusan Faqrada (1) iyo (2) ee qodobkan.
4. Haddii faa'iidada lagu helay fal-dembiyeedka la wareejiyo ama la beddelo qeyb kamid ah ama gabi ahaan hanti kale, hantida lagasoo beddelay faa'iidada lagu helay fal-dembiyeed waxay u hoggaasamaysaa hal-beegyada ku xusan qodobkan.
5. faa'iidada lagu helay fal-dembiyeedka haddii lagu dhex-milo hanti lagu helay si sharci ah, hantidaas waxay u hogaasameysaa xayiraa, xannibaad iyo la-wareegid qiimaha lagu milay ee faa'iidad lagu helay fal-dembiyeedka, iaydoo aan wax loo dhimeynin hantida kale ee lagu helay si sharci ah.
6. Dakhliga ama faa'iidada kale oo lagu beddelay faa'iidada lagu helay fal-dembiyeedka oo lagu dhex-milay hantida lagu helay fal-dembiyeedka waxay u hoggaansamayaan sida ku xusan qodobkan isku si iyo isku qiimo oo u dhiganta faa'iidada fal-dembiyeedka lagu helay.
7. Ujeeddada qodobkan iyo qodobka 55<sup>aad</sup> heshiiskan, Dawlad kasta oo xubin ah, waxaa awood loo siinayaa Hay'adaha awoodda u leh sida maxkamadaha in ay amraan Bankiga, Maaliyadda, ganacsiga, diiwaalka in uu noqdo mid la heli karo, ama la xanibi karo,
8. Dawladda xubinta ah ma diidi karto fulinta faqrada Qodobkan iyadoo salka ku haysa sirta Bankiga.
9. Dawladda Xubinta ah, waxay tixgelinaysaa suurto-galnimada inuu caddeeyo dembiilaha ilaha dhaqaale ee lagu helay si sharci ah, oo lagu eedeynyo in laga helay fal-dembiyeed iyo hanti kale oo ay tahay in lala wareego iyadoo la raacayo Mabaadi'da Asaasiga ah ee shuruucda dalka iyo Hab-raacyada kale ee Garsoor iyo hab-raacyada kale.
10. faqrada qodobkan laguma fasiri karo Xuquuqda dhinaca seddexaad si nayad wanaag ah.
11. Qodobkan kamid ma ahan mid raad ku yeelanaya mabaadi'da Garsooka, iyadoo la fulinayo hab-raacyada la tilmaamay lana waafajinayo Shuruucda



dalka ee Dawladaha Xubnaha ka ah kuwaas ay tahay inay u hoggaansamaan qodobadan.

### **QODOBKA 32<sup>AAD</sup>**

#### **ILAALINTA MARKHAATIGA, KHUBARADDA IYO DHIBANEYAASHA**

1. Dawladda kasta oo xubin ah, waxay qaadaysaa hal-beeyo ku habboon si waafqsan heshiiskan iyo nidaamka Shuruucda dalka iyadoo u jeeddadu tahay in la siiyo ilaalin wax-ku-ool ah Markhaatiyaasha iyo Xeel-dheereyaasha kuwaas oo ku markhaati furaya Falalka Dembiga laga dhigay si waafaqsan heshiiskan, sidoo kale, qaraabooda iyo shakhsiyaadka xiriirka la leh in laga ilaaliyo aar-gudasho iyo cabsi-gelin kasta oo suurta-gal ah, iyadoo aan wax loo dhimeyn Hal-beegyada faqradda (1) ee qodobkan, ee ku aaddan Xuquuqda eedeysanaha iyadoo ay ku jirto xaqa geedi-socodka Garsoorka:
  - a) abuurida hab-raaca ilaalinta jireed ee shakhsigaas si ku habboon iyo in loo oggolaasho meel ay degaan haddii suurta-gal tahay , inaan la faafinin Macluumaadka aqoosigooda iyo meesha ay degan yihiin iyo in shardi lagu xiro faafinteeda; iyo
  - b) siinta xeer-hoosaad bixinta caddeynta Marag-furka iyo Khubaradda taasoo lagu ilaalinayo bad-qabkooda sida in loo oggolaado inay isticmaalaam Xiriirka teknoolijiyada sida Vedios ama waxyaalaha kale oo la adeegsado.
2. Dawlad kasta oo Xubinta ka ah, waxay tixgelinaysaa inay gasho heshiis amah hal-beeyo ee Dawladaha kale ee xubnaha ka ah, ee ku aaddan beddelida meelaha ay joogaan shakhsiyaadkaas sida ku xusan faqradda (1) ee qodobkan.
3. Faqradaha qodobkan waxaa lagu dabaqayaa dhibaneyaasha, marka ay yihiin Markhaatiyaal.
4. Dawlad kasta oo xubin ah waxay u hoggaansamaysaa Shuruucda dalka iyo suurta-galnimada aragtida ku aaddan dhebaneyaasha iyo ina tixgeliso marxalaha ku habboon hab-raacyada Garsoor ee lidka ku ah Dembileyaasha iyadoo aan wax loo dhimeynin xaqa difaaca.

### **QODOBKA 33<sup>AAD</sup>**

#### **ILAALINTA SHAKHSIYAADKA WARBIXIYEYAASHA**

Dawladda kasta oo xubin ah, waxay tixgelinaysaa iyadoo la kaashanaysa nidaamka Sharci ee Dalka hal-beeyo ku habboon oo la siinayo ilaalo ku aaddan dhaqan kasta oo aan loo baahnayn, oo ku aaddan shakhsi kasta oo sabab wax-ku-ool ah ku wargeliya Hay'adaha ay khuseyso si niyad-wanaag ah

dhacdo kasta oo ku saabsan Falalka dembiga laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.

#### **QODOBKA 34<sup>AAD</sup>**

##### **CAWAAQIBTA FALALKA MUSUQ-MAASUQA**

Iyadoo la tixgelinayo xuquuqda dhinaca seddexaad awgeed, si niyad-wanaag ah, dawlad kasta oo xubin ah, waxay qaadaysaa ha-beegyo si waafaqsan Mabaadi'ada asaasiga ah ee Shuruucda dalka, oo lagula tacaalayo caqabadaha Musuq-maasuqa. Sidaas darteed, Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelinaysaa musuq-maasuqa inuu yahay hawlaha ugu muhiimsan oo la qaadanyo hab-raac sharci si loo baabi'iyo ama loogala noqdo heshiiska am aka qaadida Mudnaanta ama Xasaanada iyo wixii la mid ah sida Jeegaga, iyo qaadashada hab-raacyo kale oo cadaaladeed.

#### **QODOBKA 35<sup>AAD</sup>**

##### **MAG-DHAW-KA-BIXINTA WAXYEELLO**

Dawlad kasta oo xubin ah waa inay ku dartaa shuruucda dalkeeda in magdhaw la siiyo qof walbo oo waxyeello ka soo gaarto fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan, marka uu dacwad gudbisto.

#### **QODOBKA 36<sup>AAD</sup>**

##### **HAY'ADAHA AWOODDA U LEH**

Dawlad kasta oo xubin ah waa inay ku dartaa shuruucda dalkeeda hay'ad, Gollo ama shakhsiyaad awood u leh ka-hortagga Musuq-maasuqa ee fulinta sharciga. Hay'ad, Gole ama shakhsiyaad u madax-bannaan si waafaqsan shuruucdeeda Dawladda xubinta ka ah Heshiiska, si ay awood ugu yeeshaan gudshada shaqooyinkooda si hufan iyadoo wax saameyn ku yeelanin shakhsiyaadka ama shaqaalaha waxaa lagama-maarmaan ah inay helaan Hay'adaha ama Golaha tababar sare iyo agab ay ku fuliyaan.

#### **QODOBKA 37<sup>AAD</sup>**

##### **ISKAASHIGA HAY'ADAHA FULINTA SAHARCI**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadeysaa tallaabo ku habboon si loo dhiirri-geliyo qof kasta oo fal-dembiyeed ka qeybqaatayn sida ku xusan heshiiskan, si ay u helaan macaluumaat faa'iido leh hay'adaha awoodda u leh iyadoo u jeeddada tahay hannaanka barista caddeynta iyo ka-gacansiinta Hay'adaha awaooda u leh oo ka qeybqaadanaysaain laga-xaninbo dembiilayaasha faa'iidada ay ka heleen fal-dembiyeedka iyo dib-u-soo-celinta faa'iidadaas.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waa in ay qaadataa suurta-galnimada, dacwadaha ku habboon si loo yareeyo ciqaabta eedeysanaha soo bandhiga iskaashi la taaban karo oo ku aaddan baaritaanka ama dacwad-oogidda dembiga si waafaqsan heshiiskan.
3. Dawlad kasta oo xubin ah heshiiskan waa in ay tixgelisaa In la siiyo xasaanad dacwad-ku-qaadidda, iyadaoo la raacayo mabaadi'da asaasiga ah ee sharcigeeda, qof kasta oo siiya iskaashi muhiim ah baaritaanka ama dacwad ku soo oogidda dembi gaar ah iyadoo la raacayo heshiiskan.
4. Badbaadinta dadkaas iyadoo la ilaalinayo kala-duwanaashada xaaladaha, sida ku xusan Qodobka 32<sup>aad</sup> ee heshiiskan.
5. Haddii lagu helo qof sida ku cad farqada (1) ee qodobkan joogana dawlad kamid ah dawladdaha Xubnaha ah waxay iskaashi wax-ku-ool ah kasiinaysaa Hay'adaha Awoodda u leh ee dawladda kale, Dawladaha Xubnaha ah ay quseyso waxay tixgelinayaan gelitaanka heshiisyada ama sida ay ukala-horeyaan si waafaqsan sharuucda dalkooda, ee ku aaddan suurto-galnimada ay siinayaan dawladda kale wada-shaqeynta sida ku xusan faqrada (2) iyo (3) ee qodobkan.

### **QODOBKA 38<sup>AAD</sup>**

#### **ISKAASHIGA U DHEXEYYA HAY'ADAHA QARAN**

Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadanaysaa tallaabo lagu dhiirri-geliyo, si waafaqsan shuruucdooda, iskaashiga ka dhexeeya hay'adaha Qaran, sida sarkaal dadweyne iyo dhinaca kale, Hay'adaha mas'uulka ka ah baarista dembiyada ciqaabta iyo dacwo-oogidda. Waxaa kamida iskaashiga sidan:

- b) wargelinta kama-dambaysta ah ee hay'adaha, inay jiraan sababo maangal ah oo la aaminsan yahay in dembiyo kasta oo ku xusan qodobbada 15<sup>aad</sup>, 21<sup>aad</sup> iyo 23<sup>aad</sup> ee heshiiskan; ama
- t) hay'adaha waxay siinayaan dhammaan macluumaadka lagama-maarmaanka ah marka laga soo codsado.

### **QODOBKA 39<sup>AAD</sup>**

#### **ISKAASHIGA U DHEXEYYA SHIRKAD DADWAYNE IYO SHIRKAD GAARKA Loo LEEYAHAY**

1. Dawlad kasta oo ee xubin ah waxay qaadanaysaa tallaabo lagama-maarmaanka u ah in lagu dhiirri-geliyo, iyadoo raacayso shuruucdeeda,

iskaashiga ka dhexeeya Hay'adaha baaritaanka iyo Maxkamadaha Qaran, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo urrurada ganacsi ee arrimaha ku aaddan galitaanka fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa iyadoo dhiirri-gelinayso ilaalinta muwaadiniinteeda iyo dadka kale ee leh deganaanshaha dhulkeeda si loo ogeysiiyo muwaadin hay'adaha baarista iyo dacwad-oogidda galitaanka fal-dembiyeed sida ku xusan heshiiskan.

#### **QODOBKA 40<sup>AAD</sup> SIRTA BANKIYADA**

Dawlad kasta oo xubin ah waxay hubinaysaa xaladaha baaritaan ee dembiyada ka dhaca dalkeeda sida ku xusan heshiiskan, xeer-nidaamiyaha dalkeeda markay jiraan aallado ku habboon oo suurta-gelinaya in laga gudbo caqabadaha ka imaan kara dhaqan-gelinta shuruucda sirta bankiyada.

#### **QODOBKA 41<sup>AAD</sup> DIIWAANKA DEMBIGA**

Dawlad kasta ee xubin ah waxaa u bannaan in ay qaadato waxa kaga aaddan hal-beegyada sharci-dejinta iyo hal-beegyada kale isla markaana ilaalinaysa waxyaabihii hore ee dawladda kale, iyadoo ay tahay ujeeddada si loo adeegsado macluumaadka ee looga gol-leeyahay sida ugu habboon. Hab-raaca ciqaabta ee la xiriira dembiyada ku xusan heshiiskan.

#### **QODOBKA 42<sup>AAD</sup> IKHTISAAS**

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadanaysaa hal-beegayada kaga aaddan asaasidda iyo Ikhtisaaska dembiyada ku xusan heshiiskan haddii ay dhacaan labadan arrin:

a) haddii fal-dembiyeedka lagu galo dhul ay leedahay dawlad xubin ka ah heshiiskan; iyo

b) haddii uu fal-dembiyeedka uu ka dhaco markab dushiisa uu ka taagan yahay calanka dawladda xubinta ka ah heshiiskan, ama diyaarad ku diiwaan-gashan si waafaqsan shuruucda dalkaas, xilliga dembiga uu dhacay.

2. Iyadoo ilaalinaysa Qodobka 4<sup>aad</sup> ee heshiisakan Dawlad kasta ee xubin ah sidoo kale waxaa u bannaan inay Go'aan ka gaarto ikhtisaaka Maxkamadaha dembi kasta oo sidaan oo kale:

a) haddii uu galo dembiga qof kamid ah muwaadiniinta dawlad xubin ka ah ama;

b) haddii uu galo dembiga qof kamid ah muwaadiniinta dawlad xubin ka ah, ama qof si joogta ah u dagan ama qof jinsiyad-laawe ah oo ka haysta degenaansho joogta ah dalkeeda;

c) fal-dembiyeedyada ku xusan faqradda (1) xarafkeeda (b) (ii) qodobka 23<sup>aad</sup> ee heshiiskan, haddii fal-dembiyeedka lagu galo meel ka baxsan dhulkeeda tahayna u jeedada galid fal-dembi sida ku xusan faqradda (1) (a) ama (ii) (b) (i) ee Qodobka 23<sup>aad</sup> dhulkeeda dhaxdiisa si waafaqsan heshiiskan; ama

d) haddii dembiga laga galay dawlad xubin ka ah Heshiiskan.

3. Ujeeddada Qodobka 44<sup>aad</sup> ee heshiiskan, dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadanaysaa talloobooyin kaga aaddan go'aanka ikhtisaaska Garsooraha dembiyada ku xusan heshiiskan markuu eedeysanaha joogo dhulkeeda ayna dhiibin qofkaas kaliya sabtoo ah wuxuu kamid yahay muwaadiniinteeda.

4. Waxaa u bannaan sidoo kale dawlad kasta oo xubin ah inay qaadato go'aanka ikhtisaaska dembiyada ku xusan heshiiskan markuu eedeysanaha joogo dhulkeeda aysan dhiibin.

5. Haddii ay ogaato Dawladda Xubinta ah waxay qaadanaysaa ikhtisaaska sida ku xusan faqradda (1) ama (2) ee qodobkan, ama ku ogaatay qaab kale, dawlad kasta ee Dawladaha Xubnaha ah waxay sameynayaan baaritaan iyo hab-raaca dacwad-oogid ee la xiriirta isla arrintaan, hay'adaha awoodda u leh ayaa qaadayaan ee dawladahaas xubinta ah, sida loogu baahado, waa inay ka tashadaan ujeeddada hab-raaca garsoor.

6. Iyadoon wax loo dhimayn hal-beegga xeerka calamiga ah kama reebayso heshiiskan ikhtisaas kasta ee dembi oo lagu asaasay shruucda Dawladda Xubinta ah.

**CUTUBKA IV**  
**ISKAASHIGA CAALAMIGA AH**  
**Qodobka 43<sup>aad</sup>**  
**Iskaashiga Caalamiga ah**

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay iska kaashanayaan arrimaha dembiyada sida ku xusan qodobbada 44aad ilaa 50aad ee heshiiskan. Sida ugu habboon oo la jaan-qaadi kara shuruucda dalalkooda. Dawladaha Xubnaha ah

waxay tixgelinayaan inay iska caawiyaan hab-raaca baarista arrimaha ku aaddan madaniga iyo maamulka ee la xiriira Musuq-maasuqa.

2. Arrimaha iskaashiga calimaga ah, marakasta ay jiraan dembiyo kala duwan ay tahay shardi, waxaa loo qaadanayaa in la fuliyey iyadoo loo fiirinayo shuruucda Dawladda xubinta ka ah Heshiiska ee laga codsaday in ay isku si u qiimeynayaan faldembiyeedka ama eray-bixin la mid ah Dawladda xubinta ka ah Heshiiska ee soo codsatay, haddii uu yahay falka mid ku saleysan dembi ay iska caawinayaan waa fal-dembiyeed sida uu qabo shuruucda labad dawladdood.

### **Qodobka 44<sup>aad</sup> Wareejin**

1. Qodobkan waxaa lagu daaqaayaa dembiya ku usan heshiiskan haddii ay arrinta tahay qofka codsiga dib-u-celinta uu joogo dhulka Dawladda xubinta ka ah Heshiiska ee laga codsaday, waxaa loo shardinayaa dembiga codsiga wareejinta waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo sharciyada dawladda laga codsaday iyo dawladda codsatay.

2. Iyadoo aan la qaadanayn faqradda (1) ee qodobkan, dawladda xubinta ah ee sharci ahaan u oggolaanaya inay wareejiso qof kasta oo kamid ah dembiyada ku xusan heshiiskan oo aan lagu ciqaabi karin sharuucda dalkeeda.

3. Haddii codsiyada wareejintu ay ku jiraan dembiyo kala duwan, oo ugu yaraan mid kamid ah lagu soo wareejin karo sida ku xusan qodobkan qaarna aan lagu soo wareejin karin sabab la xiriirta muddadooda xabsiga balse la xiriira dembiyada ku xusan heshiiskan, waxaa u bannaan dawladda laga codsaday inay dabaqdo qodobkan sidoo kale wixii la xiriira dembiyadaas.

4. Dembiyo kasta oo qodobkan lagu dabaqo waxaa loo qaadanayaa in lagu soo daro sidii dembi ciqaab ah oo lagu wareejiyo heshiis kasta oo wareejin ka dhexeysa Dawladdaha. Dawladuhu waxay ballan-qaadayaan inay ku daraan dembiyada sida dembiyada lagu wareejinayo ee heshiis kasta oo is dhaafsi ah oo lagu dhammeeyo dhexdooda. Dawladda xubinta ah oo uu sharcigeedu sidaas oggol yahay, haddii ay dhacdo in ay u adeegsato Heshiiskan inuu yahay asaaska wareejin, looma tixgelinayo mid kamid ah dembiyadii lagu asaasay iyadoo la raacayo heshiiskan inuu yahay dembi siyaasadeed.

5. Haddii dawlad xubin ah sameyso wareejin shardi ku ah jiritaanka heshiiska uu ka helo codsi wareejin dawladda kale oo aan lahayn heshiis wax-is-dhaafsi ah, waxaa loo qaadanayaa heshiiskan inuu yahay asaaska sharciga ee wareejinta marka loo fiiriyo wixii dembi ah ee qodobkan lagu dabaqayo.

6. Dawladda xubinta ah haddii ay sameyso ku wareejin shuruudo ku saabsan jiritaanka heshiiskan waa:

b) Wakhtiga la dhigayo ansixinta, aqbalaadda ama oggolaanshaha ama helitaanka heshiiskan, loo sheegayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa loo qaadanayaa Baaqaani inuu yahay asaaska sharciga ee iskaashiga ku saabsanaan dawladdaha kale ee xubinta ka ah heshiiskan; iyo

t) Haddeysan u qaadanin heshiiskan mid salka ku haya sharci iskaashi ku saabsan wareejin, in la raadiyo, meesha ku habboon, si loo soo gabagabeeyo heshiisyada ku saabsan wareejinta dawladdaha kale ee xubnaha ka ah Heshiiskan si loo hirgeliyo qodobkan.

7. Dawladdaha xubnaha ah ee aan sameyneyn shuruudaha wareejinta jiritaanka heshiiska waxay qaadayaan dembiyada uu qodobkani u adeegsanayo dembiyada wareejinta ay is-dhaafsanayaan dhexdooda.

8. Wareejinta waxay ku xirnaanaysaa shuruudaha ku xusan Sharciga dawladda xubinta ah ee laga codsaday ama heshiisyada ciqaabta ee lagu dabaqayo, oo ay ku jiraan, inta u dhexaysa, shuruudaha la xiriira ciqaabta ugu yar ee looga baahan yahay wareejinta iyo sababaha dawladda laga codsaday oo diidi karta wareejinta.

9. Dawladdaha Xubnaha ah waa in ay ku dhaqmaan sharuucda dalkooda, ayna ku dadaalaan in ay dedejiyaan hab-raacyada wareejinta iyo in ay fududeeyaan shuruudaha caddeynta ee la xiriira fal kasta oo qodobkan lagu dabaqayo.

10. Iyadoo ilaalinaysa sharuucda dalkeeda iyo heshiisyada wareejinta, waxaa u bannaan dawladda xubinta ah ee laga codsaday, markay ku qanacdo in ay tahay duruufaha ay sababayaan oo ay degdeg yihiin oo ay codsanayaan Dawladdahaas xubnaha ah, qaadashada qof loo codsaday wareejinta eedeysi qofkaas oo jooga dhulkeeda ama la hayo ama la qaado tallaabooyin kale oo ku habboon si loo hubiyo hab-raaca wareejinta.

11. Dawlad xubin ah ee dhulkeeda uu joogo dembile la sheegay, haddii ay dhacdo looma gudbin karo qofkaas ee la xariira dembiga iyadoo la ilaalinayo dhaqan-gelinta qodobkan ku saleysan yahay oo keliya ama kamid yahay muwaadiniinteeda, markuu codsiga dawlad xubin ah oo codsanaysa wareejin, waxaa waajib ku ah inay soo gudbiso dacwada iyadoo aan dib-udhac ku imaan hay'adaha awooddo u leh ay tahay ujeeddada dacwad-qaadista, hay'adaha waxay qaadanayaan go'aan hab-raaca dacwada qaab la mid ah sida fal-dembiyeed kale oo dabiici ah marka loo eego Dawladda Xubinta ah shuruucda dalkeeda, Dawladaha Xubnaha ah oo ay khusayso waa inay iskaashi yeeshaan, gaar ahaan dhinacyada hab-raaca iyo caddeymaha, si loo hubiyo wax-ku-oolnimada dacwadan oo kale.

12. Markasta oo dawlad xubin ah oo loo oggol yahay sida ku cad sharciga dalkeeda inay wareejiso ama haddii ay dhiibto mid kamid ah muwaadiniinteeda keliya shuruuda ah in qofka lagu soo celinayo dalkaas si uu ugu qaato xukunka u harsan ama dacwadda lagu soo oogay ama si loo dhammeystiro hab-raaca ee wareejinta qofka la codsaday ee Dawladda Xubinta ah ama ogaalto wareejinta iyo dawladda kale ee soo wareejinta qofka iyo ikhtiyaarka heshiisyo kale oo ay u aragto inay ku habboon yihiin, shuruudaha ku xiran wareejinta dembiilayaasha ah ama la wareejinayo ma tahay mid ku filan gudashada waajibaadka sida ku xusan faqradda (11) ee qodobkan.

13. Haddii wareejinta, loo raadsaday ujeedooyin meel-marin xukun, sababtoo ah qofkaas wuxuu yahay muwaadin ka tirsan dawladda laga codsaday, haddii uu qabo sharcigeeda gudaha si loo waafaqo codsiyada sharcigan, marka ay dabaqayso dawladda xubinta ah ee codstay. Iyadoo ay tahay waajib-ahaanshaha fulinta ciqaabta shariciga dalkeeda codsashada ama wixii ka haray.

14. Qof kasta oo khuseeya hab-raaca dacwadaha lagu qaadayo fal-dembiyeed kasta oo qodobkani dabaqayo waxaa loo dammaanad-qaadayaa in si cadaalad ah loola dhaqmayo dhammaan heerarka dacwadaha, oo ay kujiraan dhammaan xuquuqaha iyo dammaanadda sida uu qabo sharciga Dawladda xubinta ah ee uu joogo dhulkeeda qofkaasi.

15. Wax Heshiiskan ah looma fasirayo in lagu soo rogay waajib ka-saarid wareejin haddii dawladda xubinta ah ee la codsaday uu leeyahay



sababo xoojinayo oo maan-gal ah in codsigan loo sameeyey ujeedo maxkamadayn ama ciqaabid qofka sabab la xiriirta jinsi ahaan, sinjigiisa, diintiisa, dhalasho, asal ama fikrado siyaasadeed ama u-hoggaansanaanta codsiga waxay u horseedaysaa nacaybka qofka ee mid kamid ah sababahan dartood.

16. Dawladaha xubnaha ah uma bannaana inay diidaan codsi ku aaddan wareejin iyadoo ku saleyneysa oo keliya in dembigu sidoo kale uu ku lug leeyahay arrimo dhaqaale.

17. Ka hor diidmada wareejinta, Dawladda xubinta ah waxay, haddii ay habboon tahay, la-tashanaysaa Dawladda xubinta ah ee codsatay si ay u siiso fursad ku filan oo ay ku soo bandhigto fikradeeda iyo inay soo gudbiso macluumaadka la xiriira eedeynta.

18. Dawladaha Xubnaha ah waa in ay isku dayaan in ay soo gabagabeeyaan heshiisyo laba-geesood ah iyo heshiisyo dhinacyo badan leh ama habka loo fulinayo ama kor loogu qaadayo wareejin wax-ku-ool ah.

#### **QODOBKA 45<sup>AAD</sup>**

#### **WAREEJINTA XUKUMANEYAASHA**

Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelin karaan gelitaanka heshiis laba-geesood ah ama in ka badan oo ku saabsan wareejinta dadka lagu xukumay ciqaab xabsi ama ciqaab kale oo xoriyad-ka-qaadis ah, in ay galeen falal-dembiyeed si waafaqsan Heshiiskan si ay halkaas ugu dhammeystaan muddada xabsiga lagu xukamay.

#### **QODOBKA 46<sup>AAD</sup>**

#### **ISKAASHIGA SHARCI EE WADAAGGA AH**

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay qaarkood qaarka kale siin karaan kaalmo sharci oo wadaag ah xilliga lagu jiro baaritaanka, daba-galka iyo maxkamadeynta la xiriirta fal-dembiyeedyada lagu xusay Heshiiskan.

2. Iskaashiga Sharci ee wadaagga ah waxaa loo bixinayaa sida ugu fiican iyadoo la raacayo shuruucda dawladda xubinta ah ee codsigaas heshay iyo heshiisyada, axdiyada la xiriira arrintan. Marka la joogo baaritaanka, daba-galka iyo maxkamadeynta gaarka ah ee fal-dembiyeedyada ay bannaan tahay in lagu qaado qofka sharciga ah, si waafaqsan Qodobka 26<sup>aad</sup> ee heshiiskan, ee dawladda xubinta ah ee codsanaysa.

3. Waxaa la oggol yahay in la codsado kaalmo sharci ee wadaag ah marka lagu bixinayo si waafaqsan qodobkan, ee ujeedooyinkan soo socda:

- (a) helidda caddeymo ama marag-fur dad;
- (b) gaarsiinta dokumentiyada Garsoorka;
- (c) fulinta hawlaha baaritaan, xannibaad, iyo xayiraad;
- (d) baaritaanka walxaha iyo goobaha;
- (e) bixinta xogaha, walxaha, caddeymaha iyo qiimeynta xeel-dheereyaasha;
- (f) bixinta asalka iyo nuqulada la xiriira oo ay ku jiraan diiwaanada dawladda, kuwa maaliyada iyo bankiyada diiwaanada shirkadaha, xarumaha ganacsiga;
- (g) caddeynta faa'iidooyinka laga helay fal-dembiyeedyada, hantida, walxaha, agabyada kale, ama waxyaabaha kale ee ujeeddada tahay in wax lagu caddeeyo;
- (h) fududeynta soo-taagidda dembileyaasha si iskood ah dawladda xubinta ah ee codsatay;
- (i) hab walba oo iskaashi ah oo aan ka hor-imaanayn shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga;
- (j) caddeynta faa'iidooyinka fal-dembiyeedka sida ku cad qodobbada Cutubka 5<sup>aad</sup> ee heshiiskan, xannibaadda iyo raad-raaca; iyo
- (k) dib-u-soo-celinta Hantida sida ku cad Qodobka 5<sup>aad</sup> ee heshiiskan.

4. Iyadoo aan wax loo dhimeyn shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah Laamaha u xilsaaran dawladda xubinta ah iyadoo aan helin wax codsi ah waxay u diri kartaa xogaha la xiriira fal-dembiyeedyada laamaha u xilsaaran ee dawladda kale ee xubinta ah, marka ay u aragto in xogahaasi gacan ka siin karaan dawladaasi in ay sameyso baaritaan iyo maxkamadeyn ku dhammaanaysa si guul ah, ama ay keento in loo gudbiyo dawladda xubinta ah ee kale codsi waafaqsan Heshiiskan.

5. Laamaha ay khuseyso ee helaysa xogaha waa in ay qarisaa xogahaasi, si ku-meel-gaar ah, ama waxay ku soo rogeysaa xadidaad isticmaal ka xogahaasi. Waxaase ka reebneyn dawladda xubinta ah ee codsiga heshay in ay faafiso xogahaasi si ay u bariyeesho qof eedeysane ah, marka ay halkaasi joogto dawladda xubinta ee heshay codsiga waxay gaarsiinaysaa dawladda kale ee xubinta ah ee soo dirtay codsiga inta aysan faafineyso xogahaasi, waxay la tashaneysaa dawladda xubinta ah ee soo dirtay codsiga haddii sidaa laga soo codsado. Haddii ay ku dhici weyso sidaas xaalad gaar ah awgeed,

Dawladda Xubinta ah ee heshay codsiga waxay gaarsiineysaa dawladda xubinta ah ee soo dirsatay codsiga faafinta xogahaasi si daahid-la'aan ah.

6. Axkaamta ku xusan qodobkan ma taabanayso waajibaadka ka dhalanaya heshiis kale, oo labo-geesood ah ama in ka badan ee xukumaya ama xukumi doona qeyb ahaan ama dhammaan iskaashiga sharciga ee wadaagga ah.

7. Faqrada 9<sup>aad</sup> ilaa 20<sup>aad</sup> ee qodobkan ayaa lagu dabaqayaa codsiyada lagu soo gudbiyo si waafaqsan qodobkan, haddii dawlada xubnaha uu khuseeyo aysan ku xirneyn heshiis is-dhaafsi kaalmo sharci. Haddii ay dawlada xubnaha ku xiran yihiin heshiis noocaasi ah, waxaa waajib ku ah in ay dhaqan-geliyaan axkaamta ku aaddan ee heshiiskaas, haddii aysan dawlada xubnaha isku raacin dhaqan-gelinta faqrada 9<sup>aad</sup> ilaa 29<sup>aad</sup> ee qodobkan bedelkiisa. Waxaa si adag loogu boorinayaa dawlada xubnaha ah in ay dhaqan-geliyaan faqrada haddii ay u sahlan tahay.

8. Dawlada Xubnaha ah, waxaa ka-reebbaan in ay diidaan bixinta kaalmo sharciga ee wadaagga ah, si waafaqsan qodobkan iyagoo xujo ka dhiganaya qarsoodidda Bankiyada.

9. (a) Dawlada xubinta ee heshay codsiga rabtana inay aqbasho codsiga kaalmada sharciga, si waafaqsan qodobkan iyadoo ka maran is-dhex-gelinta fal-dembiyeedyada, waxay isha ku haynaysaa ujeeddada Heshiiskan sida lagu soo caddeeyey Qodobka 1<sup>aad</sup> ee heshiiskan; iyo

(b) Dawlada xubinta ah, waxaa u bannaan inay diido bixinta kaalmada sharci iyadoo la dhaqan-gelinayo is-dhex-galka dembiyada sida ku cad qodobkan.

10. Waxaa la oggol yahay wareejinta qof walba oo xayiran ama looga xukumay ciqaab dhul dawlad xubin ah lagana doonayo inuu yimaado dawlad xubin ah oo kale si loo aqoonsado ama uu u bixiyo marag-fur, ama uu gacan ka geysan karo sidii loo heli lahaa caddeymo looga gol-leeyahay baaritaan, dagaal ama maxkamadeyn ku saabsan fal-dembiyeedyada ku jira heshiiskan, haddii labadan shardi ee soo socda la helo:

(a) oggolaanshaha qofkaasi si xor iyo oggaal leh; iyo

(b) heshiiska laamaha ay khuseeyso ee labada dawladdood oo xubnaha ah, iyagoo ku xiraya shuruudaha ay u arkaan inay ku habboon yihiin.

11. Ujeedooyinka faqrada 10<sup>aad</sup> ee Qodobkan:

(a) dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey qofka waxay u xilsaaran tahay kuna waajib ah inay hayso, haddii aysan dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey qofkaasi diidin ama laga oggolaansho-weydiin;

(b) dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey qofka waa inay u fulisaa si aan dib-u-dhac lahayn waajibka ka saaran dib-ugu-celinta gacanta dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey sida horey la iskugu raacay ama si walba oo kale. Laamaha ay khuseyso ee labo dawladdood oo xubino ah;

(c) dawladda xubinta ah ee lagu soo wareejiyey qofka waxaa ka-reebbaan inay shardi uga dhigto dawladda xubinta ah ee wareejiyey bilaabista hab-raaca la-wareegidda si dib loogu celiyo qofkaas; iyo

(d) waxaa lagu tirinayaa muddada uu qofka ku xiran yahay dawladda xubinta ah ee lagu soo wareejiyey inay ku jirto muddada ciqaabta lagaga xukumay dawladda kale ee xubinta ah ee laga soo wareejiyey.

12. Ma bannaana in la daba-galo qofka lagu soo wareejiyo si waafaqsan faqrada 10<sup>aad</sup> iyo 11<sup>aad</sup> ee qodobkan, jinsiyada uu rabo ha wato, ama in la xayiro, ama la ciqaabo ama in lagu soo rogo xadidaad xoriyad-kaqaadis dhulka dawladda xubinta loo wareejiyey, sabab ah fal ama eedeyn hore oo ah ka-bixid dhulka dawladda xubinta ah ee loo wareejiyey. Haddii aysan oggolaan dawladda xubinta ah ee loo soo wareejiyey.

13. Dawlad walba oo xubin ah waxay magacaabeysaa awood dhexe oo qaadata mas'uuliyada iyo qabashada codsiyada kaalmo sharci oo wadaag ah, sidoo kale fulinta codsiyadaas iyo u gudbinta laamaha ay khuseyso fulinteeda. Haddiise dawladda xubinta ah leedahay goob gaar ah ama gobol gaar ah oo leh nidaam madax-bannaan ee kaalmo sharci oo wadaag ah waxaa u bannaan dawladdaas inay magacaabato kaligeed awood dhexe oo qabata isla hawlaha ay qabtaan gobolkaas, dawladda dhexena waxay qaadanaysaa fulinta codsiyada ay heshay iyo inay si degdeg u gudbiso hab munaasib ah. Dawladda dhexe waxay u gudbineysaa codsiga laamaha ay khuseyso fulinta codsigaas. Iyadoo ku dhiiri-gelinaysa laamaha ay khuseyso fulinta codsigaas sida degdeg ah oo nabad ah. waxaa la gaarsiinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay iyadoo loo marayo laanta dhexe eek u magacaaban ujeedkan waqtiga ay dawladda xubinta ah gudbineyso dukumentiyadeeda meel-marinta heshiiskan ama aqbalaadda ama oggolaanshaha ama kamid-noqoshada. Codsiyada kaalmada sharciga ee wadaaga ah iyo dhambaalada la xiriiira waxaa lagu hagaajinayaa ama loo dirayaa laamaha dhexe oo ay soo magacaabayaan dawladda xubinta ah. Codsiyadan wax uma dhimayaan xaqa dawladda xubinta ee ah inay ku shardiso ku hagaajinta codsiyada iyo

dhambaalda iyadoo loo marayo marinnada diblamaasiyadeed. Xaaladaha degdega ah haddii ay labada dawladdood ee xubinta ah isku-raacaan inay isku mariyaan ururka Booliska caalamiga eek a hortagga dembiyada, haddii ay suurta-gal tahay.

14. Codsiyada waxaa lagu soo-gudbinaa iyagoo qoraal ah, ama haddii ay suurta-gal tahay hab kale oo abuuri kara dukumenti qoraal ah, luqada laga oggol yahay dawladda xubinta ah ee codsiga loo diray sidoo kale inuu qoraalka noqdo mid ay dawladda xubinta hubin karto sax ahaanshihiisa. Waxaa loogu gudbinaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay luqad ama luqadaha laga oggol yahay dawladda xubnaha ah marka ay gudbineyso warqada oggolaanshaha heshiiskan ama aqbalidda ama sixiixidda ama kamid-noqoshada. Xaaladaha degdega ah marka labo dawladdood isku waafaqaan sidaas waxaa la oggol yahay in codsiyada laga soo gudbiyo si hadal ah (oral) kaddibna laga dhigo qoraal.

15. Codsiga kaalmada sharciga wadaagga ah wuxuu ka koobnaanayaa:

- (a) Aqoonsiga dawladda codsiga gudbineysa;
- (b) Mawduuca iyo nooca baaritaanka, dacwad-qaadista ama hab-raaca garsoorka ee la xiriira iyo magaca maamulka qabanaya baaritaanka, dacwad-qaadista iyo hab-raaca garsoorka;
- (c) Qoraal kooban oo la xiriira mawduuca, marka laga reebo waxyaabaha ku saabsan codsiyada lagu soo gudbiyey ujeeddo ah gaarsiinta dekontiyada garsoorka;
- (d) Sharraxaad kaalmada la sheegay iyo faahfaahinta hab-raacyada gaarka ah oo ay dawladda xubinta ah ee codsanaysa rabto inay raacdo;
- (e) Aqoonsiga qofka ay khuseyso, halka uu joogo iyo jinsiyadiisa, marka ay suurta-gal tahay; iyo
- (f) Ujeeddada laga doonayo caddeymaha, xogta ama hab-raacyada.

16. Dawladda xubinta ah, ee codsiga heshay waxaa loo oggol yahay inay dalbato xogaha dheeriga ah marka ay u aragto inuu yahay lagama-maarmaan fulinta codsiga si waafaqsan shuruucdeeda gudaha, ama suurta-gal tahay inay fududeyso fulinteeda.

17. Codsiyada waxaa loo fulinayaa si waafaqsan shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga, iyo sidoo kale si waafaqsan hab-raaca ku xadiddan codsiga, marka ay u suurta-gal tahay haddii uusan ka hor-imaanayn shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga.

18. Haddii qof jooga dhulka dawlad xubin ah, lagana rabo in la maqlo marag-furkiisa, ama xeel-dheere looga baahdo inuu horyimaado laamaha garsoorka dawlad kale oo xubin ah ayna suurta-gal tahay lana jaan-qaadaysa mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucda gudaha dalkaas, waxaa u bannaan dawladda xubinta ah ee kowaad inay oggolaato, iyadoo fulinaysa codsiga dawladda xubinta ah ee kale. Qabashada fadhi dhageysi iyadoo la adeegsanayo fogaan-arag (video) haddii ay adkaato hor keenista qofka garsoorka dawlad xubinta ah ee codsiga leh, waxaa u bannaan labada dawladdood ee xubnaha ah inay isku raacaan maamulidda fadhiga gar-maqalka laanta garsoorka ee dawladda xubinta ah ee codsiga wadata ayna goobjoog ka noqdaan laamaha garsoorka ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga.

19. Dawladda Xubinta ah ee codsiga leh uma bannaana in xogaha iyo caddeymaha ay ka heshay dawladda xubinta ee codsiga heshay inay u isticmaasho baaritaano iyo maxkameyn aan ku jirin codsiga ay soo gudbisay iyadoo aan oggolaansho hore ka haysanin dawladda xubinta ah ee codsiga loo gudbiyey. Faqraddan kuma jiro wax u diidayo dawladda xubinta ee codsiga gudbisay inay faafiso hab-raacyada, xogaha iyo caddeymaha barriyeelayo qof eedeysane ah. Marka halkaas marayso dawladda xubinta ah ee codsanaysa inta aysan faafinta xogaha iyo caddeymaha waa inay ogeysiisaa kana talagelisaa dawladda xubinta ee codsiga heshay marka laga dalbado. Haddii ay suura-geli weyso iyadoo jirto xaalad gaar ah waxay ogeysiinaysaa dawladda xubinta ah ee codsiga heshay inay faafiso si tartiib ah.

20. Waxaa u bannaan dawladda xubinta ah ee codsiga leh inay ku shardiso dawladda xubinta ah ee codsiga heshay inay ilaaliso sir ahaanshaha codsiga iyo ujeedkiisa, marka laga reebo inta lagama-maarmaanka u ah fulintiisa. Haddii ay noqon weyso dawladda xubinta ah ee codsiga heshay waa inay u hoggaansantaa shardiga qarsoodida, waxaa waajib ku ah gaarsiinta dawladda xubinta ah ee codsiga leh si degdeg ah.

21. Waxaa bannaan diidmada bixinta kaalmada sharciga ee wadaagga ah haddii ay jiraan arrimahan soo socda:

- a) Haddii aan lagu soo-gudbin si waafaqsan axkaamta qodobkan;
- b) Haddii ay dawladda xubinta ah ee heshay codsiga u aragto fulintiisa mid wax-u-dhimaya madax-bannaanideeda, nabadgelyadeeda, nidaamkeeda guud iyo danaheeda asaasiga ah;

- c) Haddii uu shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee codsiga heshay ka reebayo laamaheeda inay fuliyaan hab-raacyada laga codsaday ee ku saabsan fal-dembiyeedyada la mid ka ah, xitaa haddii uu fal-dembiyeedkaasi ku jiro gacanta laamaha garsoorka si baaritaan, iyo daba-gal loogu sameeyo; iyo
- d) Haddii ka-jawaabista codsiga ay ka hor-imaanayso nidaamka sharci ee dawladda xubinta ah ee codsiga heshay inta ku saabsan kaalmada sharci ee wadaagga ah.

22. Dawladda xubinta ah uma bannaana inay u diido codsiga kaalmada sharciga ee wadaagga ah inuu la xiriiro arrimo maaliyadeed awgeed.

23. Waa in la sheegaa sababaha diidmo walba oo ku saabsan kaalmada sharci ee wadaagga ah.

24. Dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxay fulinaysaa codsiga kaalmada sharci ee wadaagga ah xilliga ugu sokeeya ee suurta-galka ah, waxay ilaalinaysaa waqtiga ugu gaaban oo ay codsatay dawladda xubinta ah, waxaa la rabaa in sababaha lagu sheego codsiga, dawladda xubinta ah ee codsiga leh waxaa u bannaan inay u soo gudbisno weydiimaheeda maan-galka ah si ay u hesho xoggo ku aaddan hab-raacyada ay u martay dawladda xubinta ee codsiga heshay ka-jawaabidda codsigeeda iyo hormaradda ay ka sameysay arrintaas. Dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waa inay kaga jawaabta weydiimahaas iyo horumarka laga gaaray fulinta codsiga. Dawladda xubinta ah ee codsanaysa waxay si degdeg ah u gaarsiinaysaa codsigeeda ah baahida ay u qabto kaalmo sharci.

25. Dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxaa u bannaan inay dib u dhigto kaalmada sharci ee wadaagga ah inay ka hor-imaanayso baaritaanada iyo hab-raaca garsoor ee socda awgeed.

26. Ka hor inta aan la diidin codsiga sida ku cad faqradda 21<sup>aad</sup> ee qodobkan ama aan dib loo dhigin sida ku xusan faqradda 25<sup>aad</sup> ee qodobkan, dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxay la tashan doontaa dawladda xubinta ee gudbisay codsiga si ay uga fiirsato ay bixin karta caawinaad sharci, iyadoo ay ku xiran tahay shuruudaha iyo shuruudaha sida ay u aragto in loo baahan yahay. Haddii dawladda xubinta ah ee codsanaysa ay aqbasho caawinnaadda ku saleysan shuruudahaas, waa inuu u hoggaansamaa leh shuruudaha.

27. Iyadoo aan wax loo dhimmeyn dabaqaadda faqradda 12<sup>aad</sup> ee qodobkan, ma bannaano in la daba-galo, la soo xiro ama la ciqaabo markhaati ama xeel-dheere ama qof kale, iyadoo laga duulayo codsiga dawladda xubinta ah ee codsiga leh iany soo gudbisoo marag-furkeeda hab-raaca garsoor, ama in ay gacan ka geystaan baaritaanka iyo daba-galka iyo hab-raaca garsoorka ka jira dhulka dawladda xubinta ah ee codsatay.

28. Dawladda xubinta ah ee codsiga heshay waxay qaadanaysaa bixinta lacagaha caadiga ah ee ku baxa fulinta codsiga, haddii aysan labada dawladdood ee xubnaha ah aysan isku raacin si kale. Haddiise fulinta codsiga uu ku baxayo kharash fara badan labada dawladdood ee xubnaha ah ay khuseyso arrinta ayaa ka wada-tashanayo xadididda iyo fulinta qodobada iyo shuruudaha lagu heshiiyey, iyo sidoo kale qaabka loo bixinayo kharashaadkaas.

29. Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday:

(a) waxay siinaysaa dawladda xubinta ah ee codsiga soo gudbisay nuqullo kamid ah diiwaanada, dekumentiyada iyo xogaha dawladeed ee u oggolaanayo shuruudaha dalkaas inay helaan dadweynahooda;

(b) dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxaa loo oggol yahay inay siiso dawladda xubinta ah ee soo gudbisay codsiga dhammaan ama qeyb kamid ah shuruudaha ay u aragto inay habboon yihiin, nuqullo kamid ah diiwaanada, dekumentiyada iyo xogaha dawladeed ee u oggolaanaya shuruudaha dalkaas inay helaan dadweynahooda.

30. Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelineyaan, haddii ay lama-huraan tahay, suurta-galnimada in ay dhammeystiraan heshiisyo iyo afgaradyo labo-geesood ah ama ka badan oo u adeegaya ujeedooyinka dhaqangelinta Qodobkan ama horumarinta axkaamtiisa.

## **QODOBKA 47<sup>AAD</sup>**

### **WAREEJINTA DACWADAHADA FAL-DEMBIYEEDYADA**

Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelineyaan suurta-galnimada isu-wareejinta dhexdooda ee maxkamadaynta fal-dembiyeed lagu abuuray si waafaqsan Heshiiskan ee dacwadaha wareejintaas loo tixgelinayo in ay noqdaan kuwo ku saleysan danaha maamul hab-sami leh ee cadaalad, gaar ahaan dacwadaha ay ku shuqlan yihiin dhawr ikhtisaas, oo looga gol-leeyahay in diirrada la saaro maxkamadeynta.



**QODOBKA 48<sup>AAD</sup>**  
**ISKAASHIGA FULINTA SHARCIGA**

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay yeelanayaan iska-kaashi adag oo dhexdooda ah, si ku aaddan nidaamyadooda gudaha ee sharci iyo maamul, si ay u horumariyaan waxtarnimada falka fulinta sharciga si looga hortago fal-dembiyeedyada ku xusan Heshiiskan. Dawladaha Xubnaha ah waxay, si gaar ah, u qaadayaan tallaabooyin waxtar leh:
  - (a) In la horumariyo iyo, haddii ay lama-huraan tahay, in la abuurto marino xiriir ee hay'adahooda awoodda leh, wakaaladaha iyo adeegyada si loo fududeeyo is-dhaafsiga xogaha si nabdoon oo degdeg ah dhammaan qeybaha fal-dembiyeedka ee ku xusan Heshiiskan, sida, haddii ay dawladaha xubnaha ah ee ay khusayso la habboonaato, isku-xirnaansho hawlaha fal-dembiyeed ee kale;
  - (b) In la kaashado dawladaha kale ee xubnaha ah, si loo fuliyo baaritaano la xiriira fal-dembiyeedyada ku xusan Heshiiskan ee khuseeya:
    - (i) Aqoonsiga dadka looga shakisan yahay inay gacan ku leeyihiin fal-dembiyeedka iyo meelaha laga heli karo iyo hawlaha, sidoo kale goobaha ay ku sugan yihiin dadka kale ee uu khuseeyo;
    - (ii) Dhaqdhaqaaqa faa'iidada laga helay fal-dembiyeedka iyo hantida laga helo gelidda fal-dembiyeedka; iyo
    - (iii) Dhaqdhaqaaqa hantida ama agabka ama qalabka kale ee loo isticmaalay ama ujeeddada ahayd in lagu galo fal-dembiyeed;
  - (c) Sameynta marka lagama-maarmaanka ay tahay in la bixiyo noocyada iyo tirada walxaha iyadoo ujeedka yahay fal-dembiyeedka iyo baaritaan;
  - (d) Dawladaha Xubnaha ah waxay yeelanayaan isweydaarsi xogaha marinnada iyo hababka loo isticmaalo fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan, sidoo kale isticmaalka dhalashooyinka been-abuurka ah iyo dukumentiyada been-abuurka ah iyo hababka kale ee qarinta hawlaha;
  - (e) Si loo fududeeyo isku-duwid wax-ku-ool ah oo u dhexeysa mas'uuliyiinta awoodda u leh, wakaaladaha iyo adeegyada si loo dardar-geliyo isweydaarsiga saraakiisha iyo xeel-dheereyaasha kale, si waafaqsan heshiisyada labo-geesoodka ah ama heshiisyada u dhexeeya Dawladaha Xubnaha ah; iyo
  - (f) In la isweydaarsado macluumaadka iyo isku-duwid hawlaha maamul, iyo hab-raacyada ku habboon ee loo qaadayo iyadoo ujeeddada tahay ka-hortagga fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan;
1. Iyadoo la dhaqan-gelinayo heshiiskan, Dawladaha Xubnaha ah waxay gelayaan heshiisyo iyo is-af-garad labo-geesood ah ama in ka badan si ay iskaashi toos ah u yeeshaan laamaha ay khuseeyso fulinta sharciga. Marka wax-

ka-bedel lagu saameynayo heshiiska iyo af-garadka jiro. Haddii uusan jirin heshiis iyo af-garad u dhexeeya Dawladaha Xubnaha ah oo ku saabsan iskaashiga sharci waxaa u bannaan dawladda xubinta ah inay heshiiskan ka dhigto mid bud-dhig u ah iskaashiga sharci ee wadaagga ah marka la fulinayo sharciga ujeedkiisa yahay fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan. Dawladaha Xubnaha ah waxay ka faa'ideysanayaan heshiisyada iyo af-garadka, ayna ku jiraan hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa gobolka si loo adkeeyo xiriirka iskaashi ee dawladdaha ay khuseyso.

2. Dawladaha Xubnaha ah waxay yeelanayaan iskaashi inta ay awoodooda gaarsiisan tahay si ay uga hortagaan fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan ee lagu galay aaladaha casriga ah.

#### **QODOBKA 49<sup>AAD</sup>**

##### **BAARITAANNADA WADAAGGA AH**

Dawladda xubinta ah waxay eegaysaa gellida heshiisyo iyo af-garadyo labo-geesood ah ama ka badan oo u oggolaanayo laamaha ay khuseyso inay asaasaan hay'ado baaritaan oo wadaag ah, daba-gal iyo garsoor u dhexeeya dawlad iyo wax ka badan. Marka aysan wax heshiis ah ama is-af-garasho oo arrintan ku saabsan waxaa la oggol yahay sameynta baaritaan wadaag ah sida ay tahayba. Dawladaha Xubnaha ah oo ay khuseyso waxay damaanad-qaadayaan ilaalinta iyo ixtiraamka madax-banaanida dawladda xubinta ah ee baaritaannada ka wada dhulkeeda.

#### **QODOBKA 50<sup>AAD</sup>**

##### **HAB-RAACYADA BAARITAANKA GAARKA AH**

1. Si loola dagaallamo musuq-maasuqa si hufan, Dawlad kasta oo Xubin ah, Awoodda oggolaansho ee mabaadi'da asaasiga ah ee sharciyadeeda iyadoo la raacayo shuruudaha uu farayo sharcigeeda, qaado tallaabooyinkan oo kale sida loogu baahan yahay, iyadoo loo adeegsanayo, in loo oggolaado adeegsiga munaasib ah Mas'uuliyiinta karti u leh gaarsiinta la xakameeyey iyo, meeshii ay u aragto inay ku habboon tahay, mid kale farsamooyinka baarista gaarka ah, sida elektiroonigga ama qaabab kale oo ka war-haynta iyo baadhitaan hawleed, gudaha dhulkiisa, iyo in loo oggolaado oggolaanshaha gudaha maxkamadda caddeynta laga soo saaray halkaas.
2. Ujeeddada baarista dembiyada kooban ee Heshiiskani gaaray, Dawladaha Xubnaha ah waxaa lagu dhiirri-gelinayaa inay soo gabagabeeyaan, marka lagama-maarmaanka ay tahay, heshiisyada, dhinacyo badan ama

qabanqaabooyin loo adeegsanayo baaritaanka noocaas ah hab-raacyada macnaha guud ee iskaashiga heerka caalamiga ah. Heshiisyada noocan oo kale ah ama qabanqaabooyinka waa in la soo gabagabeeyaa lana hirgeliyaa si buuxda u-hoggaansanaanta mabda'a sinnaanta madax-bannaanida dawladaha, waa in si adag loogu fuliyaa iyadoo la raacayo shuruudaha heshiisyadaas.

3. Marka aanu jirin heshiiska ku xusan faqradda (2) ee qodobkan, go'aannada loo adeegsado hab-raacyada baarista khaaska ah ee Heerka caalamiga ah waa in lagu saleeyaa kiis-kiis iyadoo ay suurta-gal tahay, markii loo baahdo, tixgeliyaana abaabulka dhaqaale iyo fahamka si qaddarin leh Ku dhaqmidda awoodda Dawladaha Xubnaha ah.
4. Go'aannada loo adeegsado keenista la xakameynayo heerarka caalamiga ah, waxaa oggolaanaya Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiska, waxaa kamid ah habab ay kamid yihiin go'aannadaha iyo u oggolaanshaha badeecadda ama lacagaha inay sii socdaan ama laga saaro ama lagu beddelo gabi ahaan.

## **CUTUBKA V SOO-CELINTA HANTIDA MUUQATA**

### **QODOBKA 51<sup>AAD</sup> XUKUN GUUD**

Soo-celinta hantida sida ku xusan cutubkan waa mabda' asaas u ah heshiiska, iyo Dawladaha Xubnaha ah waa inay midba midka kale u awoodi karo iskaashi dhinacan oo kale ah.

### **QODOBKA 52<sup>AAD</sup> KA-HORTAGGA IYO OGAANSHADA WAREEJINTA FAA'IIDOOYINKA FAL- DEMBIYEEDKA**

1. Iyadoon ka marnayn qodobka 14aad ee heshiiskan, Dawlad kasta waxay qaadaysaa talaabooyinka loo baahdo, si waafaqsan shuruucdeeda, hay'adaha maaliyadda u baahan xaddiddaada si loo xaqiijiyo aqoonsiga macaamiisha, inay qaadaan talaabooyin suurta-gal ah, si loo go'aamiyo aqoonsiga milkiilayaasha ka faa'iida Lacagta lagu shubay xisaabaadka qiimahoodu sareeya iyo in la sameeyo kor-jooqteyn kor loogu qaadayo akoonadaas oo la dalbaday laguna matalayo shakhsiyaadka, ku aaminay shaqooyin caan ah oo bulshada ka tirsan iyo xubnaha qoyskooda iyo xiritaan dhow iskaashatada.

Baaritaanka la xoojinayo waa in loo sababeeyaa si suurta-gal ah ee loogu talo-galay in lagu ogaado shaki macaamil ganacsi oo loogu talo-galay in lagu wargaliyo mas'uuliyiinta kartida leh mana aha inay ahaato waxaa loo dhisay sidii looga niyad-jebin lahaa ama looga mabnuuci lahaa hay'adaha maaliyadeed inay ganacsi sameeyaan oo ay la jiraan macaamiil sharci ah.

2. Si loo fududeeyo fulinta qorshaha qoran ee faqradda (1) ee qodobkan, Dawlad kasta, si waafaqsan shuruucdeeda, waxa dhiirri-geliyey dadaallo ku habboon oo ka socda gobolka, dhex-dhexaadin iyo dhinacyo badan ururada ka dhanka ah lacagta la dhaqay.

